Doorka ay diinta Islaamku ku leedahay manhajka waxbarashada tacliinta aa-saasiga ah ee Turku, 1.8.2016

Manhajka waxbarashada tacliinta aasaasiga ah ee Turku cutubka 13: aad fasallada 1-2

13.4.6 DIINTA

Hadafka laga leeyahay maaddada

Hadafka laga leeyahay maaddada diinta, waa iney siiso ardeyga ilbaxnimo diimeed ballaaran oo ku saleysan falsafad sugan. Waxbarashadan waxey ardeyda ku carbineysaa maaddada diinta ee markaas la baranayo iyo qeybaha ay u kala baxdo. Waxey maaddadan ardeyga bareysaa diinta iyo caadooyinka falsafadeed ee ka jira Finland iyo sidoo kale diimaha iyo falsafadaha kale ee ka jira guud ahaan caalamka intiisa kale. Maaddadu waxey horumarineysaa fahanka xiriirka ka dhexeeya diinta iyo dhaqanka, waxeyna bareysaa ardeyga xeelad xog ururin, taasoo ku saabsan diimaha iyo falsafadaha kala duwan. Waxbarashadu waxey ardeyga aqoon kala duwan ka siineysaa diimaha, taasoo ka caawin doonta inuu fahmo guud ahaan wadaxaaajood
ka/wada hadalka laga galo diimaha. Waxaa ardeyga lagu hagayaa inuu u fekero qaab uu maskaxdiisa adeegsanayo waxna isku weydiinkaro iyo inuu ka eego/fiirsho diimaha dhinacyo kala duwan. Inta lagu gudajiro waxbarashadan, waxaa lagu falanqeynayaa xiriirka ka dhexeeya cilmiga iyo diinta iyo sidoo kale luuqadda u goonida ah diimaha, sida marka laga hadlayo astaamaha lagu kala garto diimaha iyo ereybixinnada diimaha. Waxbarashada xiisadda diinta waxey carbis u tahay wada xaajodka/wada hadalka ka dhexeeya diimaha iyo falsafadaha kala duwan ee nolosha ama wadaxaajoodka ka dhacaya diinta iyo falsafadda gudeheeda. Waxbarashadan waxey ardeyga ku dhiirrigelineysaa inuu ixtiraamo nolosha, qiimaha binu aadamku leeyahay iyo waxyaalaha agtiisa ama dadka kale agtooda ka karaameysan/barakeysan.

Waxbarashada xiisadda diinta waxaa lagu darsayaa, hab akhlaaqeedka looga fekero diinta ay xiisaddu khuseyso iyo diimaha iyo falsafadaha kale ee jira. Sidoo kale waxaa ardeyda lagu bogaadinayaa iney dhankooda ka fekeraan su`aalaha akhlaaqda ku saabsan. Waxbarashadan waxey saacideysaa aqoonta uu ardeygu u leeyahay naftiisa, ixtiraamka uu naftiisa u hayo iyo koboca iskufillaanshaha nololeed muddada uu dhiganayo tacliinta aasaasiga ah. Waxbarashadan waxey ardeyga sahay u siineysaa dhisidda iyo qiimeynta shakhsiyaddiisa, falsafaddiisa nolosha iyo aragtida uu ka aaminsan yahay caalamka intiisa kale. Waxbarashada xiisadda diintu, waxey ardeyga ka kaalmeyneysaa koboca dhinaca bulshada iyo sidii uu ku noqon lahaa xubin xilkas ah oo ka mid ah bulshada dimuqraadiga ah iyo sidii uu ardeygu ku noqon lahaa shakhsi hab caalami ah u fekera.

Fasallada 1-2 hadafka laga leeyahay waxbarashada xiisadda diinta, waa in lagu hago ardeyda, aqoonta iyo ixtiraamka ay u qabaan diintooda iyo falsafaddooda nololeed ee ay kasoo jeedaan iyo iney si ixtiraam ku jiro u qaabbilaan diimaha iyo falsafadaha kale ee laga aaminsan yahay fasaladooda, iskuulkooda iyo nawaaxiga ay ku nool yihiin. Waxbarashadu waxey ardeyga siineysaa xog iyo xeelad aasaasi ah, waxey ka dhiseysaa habkii uu sida kor ku xusan ugu fekeri lahaa. Ardeyda waxaa lagu dhiirrigeliyaa iney muujiyaan dareenkooda iyo fikirkooda, sidoo kale-na iney tixgeliyaan oo ay ixtiraamaan dareenka iyo fikirka dadka kale. Waxaa ardeyda lagu bogaadiyaa iney wax la yaabi karaan, su`aalo weydiiyaan, kana qeyb qaataan wadaxaajoodka ka dhacaya fasalka gudihiisa. Waxaa ardeyda lagu hagaa iney u dhaqmaan si xilkas ah oo caddaalad ku jirto.

Ahdaafta laga leeyahay waxbarashada diinta ee fasallada 1-2

Ahdaafta waxbarasho	Cutubyada la xiriira ahdaafta	Aqoon u yeelasho balaaran
T1 in ardeyga lagu dhaliyo xiise ku saabsan waxbarashada diinta iyo in tilmaamo laga siiyo sidii uu u aqoonsan lahaa aasaaska diinta iyo caqiidada ay qoyskiisu aaminsan yihiin	S1, S2, S3	L2, L4
T2 in ardeyga lagu hago barashada siirada, astaamaha iyo arrimaha ududbdhexaadka u ah diinta xiisadda lagu dhiganayo	S1	L1
T3 in ardeyga lagu hago barashada habdhaqanka , xafladaha waaweyn iyo isbedelka xilli sannadeedka ee khuseeya diinta xiisadda lagu dhiganayo.	S1	L2, L7
T4 in ardeyga lagu dhiirrigeliyo barashada habdhaqanka , xafladaha ay leeyihiin diimaha iyo iyo caqiidooyinka kale ee laga aaminsan yahay fasalkiisa, iskuulkiisa iyo nawaaxiga uu ku nool yahay.	S2	L2, L3, L7
T5 in ardeyga lagu geesinnimo galiyo inuu garto oo uu cabbiro fikirkiisa iyo dareenkiisa	S1, S3	L2, L6, L7
T6 in ardeyga lagu hago cadaaladfalka, sidii nafta qofka kale ugala mid dhigi lahaa naftiisa oo kale iyo sidii uu u ixtiraami lahaa fikirka iyo caqiidada qofka kale iyo guud ahaan xuquuda binu aadamka	S1, S2, S3	L2, L6, L7
T7 in ardeyga lagu hago inuu wax u gorfeeyo qaab akhlaaq ku dhisan, inuu dareemo micnaha ay leedahay inuu qofku masuuliyad iska saaro naftiisa, bulshada ku hareereysan, deegaanka iyo bey`ada	S3	L3, L7
T8 in ardeyga loo abuuro jawi iyo fursad uu ku tababarto habka uu fikirkiisa usoo jeedin karo kuna sababeyn karo iyo sidoo kale dhageysiga iyo fahamka fikradaha kala duwan	S1, S3	L1, L5, L6, L7

Mawduucyada iyo casharrada ududbdhexaadka u ah ahdaafta xiisadda diinta ee fasallada 1-2

Mawduucyada lagu baranayo xiisada diinta xulashadooda iyo dejintooda waxaa lagu saleeyaa hadafka guud ee laga leeyahay maaddada iyo qaabka loo gaari karo hadafkaas. Marka la dooranayo mawduucyada iyo casharradooda xiisadda lagu dhigayo, waxaa laga faa'iideystaa fursadaha ka jira deegaankaas. Fasallada waxaa loo dajiyaa cutubyo iyo casharro kaamil ah oo ku saleysan heerka fasalka uu ardeygu marayo. Marka la dajinayo cutubyada casharrada fasal walba, waxaa la tixgeliyaa heerka aqoonta ardeyga iyo khibradda uu ka heysto caalamka.

S1 Xiriirka uu ardeygu la leeyahay diintiisa: Waxbarashadu waxaa lagu billaabaa in loo kuurogalo oo la barto qoyska uu ardeygu kasoo jeedo: ehelka, taariikhada, diinta ama falsafadda nolosha ee uu qoyskaas aaminsan yahay. Qeybaha aadka muhiimka u ah ee ay casharradu khuseeyaan waxaa kamid ah, xafladaha iyo feestooyinka la xiriira diinta uu ardeygu aaminsan yahay iyo habka ay xafladuhu u dhacaan iyo qiimaha ay leeyihiin. Casharrada maaddada diinta waxaa qeyb ka ah oo ku gudajira siirada, caadooyinka iyo dhaqamada ay xambaarsan tahay diinta uu ardeyga aaminsan yahay. Waxaa xiisadda lagu gorfeeyaa ereybixinta iyo astaamaha ududbdhexaadka u ah diinta iyo sidoo kale qeybaha ay diintu usii kala baxdo.

S2 Diimaha caalamka: Marka la xulanayo mawduucyada casharka, waxaa aasaas u ah diimaha bulshada iskuulka iyo nawaaxiga ka agdhow laga aaminsan yahay iyo caadooyinka iyo xafladaha ay diimahaasu leeyihiin. Marka mawduucyada la xulayo, waxaa sidoo kale la tixgeliyaa fikirka dadka aan diinta laheyn ee aan waxba aaminsaneyn.

S3 Nolosha wanaagsan: Waxbarashada waxaa qeyb ka ah su`aalaha la xiriira nolosha, dhalashada iyo dhimashada iyo binu aadamka iyo tixgelinta nolosha. Waxaa casharrada qeyb muhiim ah ka gala, fahanka falalka uu ardeygu ku dhaqmo iyo cawaaqibta ka dhasha, masuuliyadda qofka ka saaran shakhsiga kale, deegaanka iyo bey`ada iyo inuu qofku nafta qofka kale kasoo qaado naftiisa oo kale, qiimaha binu aadamka iyo tixgelinta kala duwanaanshaha. Waxaa casharka si hordhac ah loogu bartaa xuquuqda carruurta iyo qiimaha ay leedahay. Inta lagu jiro xulashada/doorashada casharrada, waxaa si gaar ah loo tixgeliyaa heshiiska ku saabsan xuquuqda carruurta ee hay`adda qaramaha midoobey iyo bedqabid dhammeystiran. Casharradu waxey taakuleynayaan xeeladda muujinta dareenka iyo koboceeda.

Ahdaafta la xiriirta deegaanka lagu baranayo iyo habka loo baranayo maaddada diinta ee khuseysa fasallada 1-2

Inta ay xiisadda diintu socoto waxaa la hiigsadaa in la abuuro jawi lagu wada sheekeysto oo furan, kalsooni ku dheehan tahay oo aan degdeg laheyn. Waxaa muhiim ah in ardey waliba uu dareemo in la maqley fikirkiisa iyo khibraddiisa. Ardeyda waxaa lagu dhiirrigeliyaa iney qaab wadaxaajood ku dhisan wax ku bartaan oo ay fikirkooda sabab u yeelaan iyo iney tixgeliyaan kala duwanaanshaha. Waxaa waxbarashada udubdhexaad u ah ardeyga iyo tixgelinta habfikirkiisa, khaas ahaan marka la falanqeynayo arrimaha la xiriira akhlaaqda.
Wadaxaajoodka, mashruucyada ay ardeydu wada sameynayaan, allifaadda iyo qaababka wadashaqeyntu, waxey si buuxda u taakuleyneysaa ardeyga, waxeyna ka dhigeysaa qof firfircoon oo xirfad u leh inuu dadka kale la macaamalo, isla markaasna isticmaala xubnihiisa dareen oo dhan. Inta uu casharku socdo, waxaa dhici karta in ardeydu ay kawadashaqeeyaan mashruucyo gaar ah iyo kuwa wadareed, oo la xiriiri cutubyada kala duwan ee maaddada, waxeyna xataa ka talawsan karaan xuduudda maaddada u dagsan.
Inta lagu gudajiro casharka, waxaa si kala duwan looga faa'iideysanayaa tegnoloojiga isgaarsiinta casriga ah. Waxaa la adeegsanayaa sheekooyin, muusiko, sawirid, ciyaaro, jilitaan, martigelin iyo booqashooyin meelo kala duwan lagu tago, taasoo taakuleyneysa/adkeyneysa farxadda waxbarashada iyo wadashaqeynta kala duwan.

Hagitaan, tixgelinta baahida iyo kaladuwanaanshaha ardeyda iyo ka taakuleynta maaddada diinta ee fasallada 1-2

Barista cutubyada kala duwan ee maaddada diinta, waxaa lagu tixgeliyaa baahida kala duwan ee ay qabaan ardeydu iyo kaladuwanaanshaha luuqadda iyo dhaqanka. Mawduucyada udubdhexaadka u ah maaddada waxaa lagu gorfeeyaa oo loosoo bandhigaa qaab hufan oo ay dhammaan ardeyda oo dhan wadafahmi karaan. Qaababka la isticmaalayo ee wax lagu baranayo, waxaa looga heshiiyaa hab ku saleysan da`da ardeyga. Inta uu casharku socdo waxaa la abuuraa jawi horumarinaya waxbarashada iyo ka qeybqaadashada xiisadda. Waxaa la xoojiyaa xirfadaha barasho ee ku dhiirranaanta ardeyga.

Qiimeynta heerka aqoonta ardeyga ee maaddada diinta ee fasallada 1-2

Habka loo qiimeynayo waxbarashada maaddada diinta, waa mid ay ku dheehan tahay hagis iyo dhiirrigelin. Fikiruruurinta kala nooca ah ee ardeyda laga qaado, waxey ku ku saleysan tahay wadashaqeynta iyo wadasheekeysiga ka dhexdhaca xiisadda gudaheeda. Fikiruruurintu waa mid hageysa ardeyda, kuna dhiirrigelineysa iney fikirkooda cabbiraan. Inta ay xiisaddu socoto, waxaa ardeyda la siiyaa jaanis/fursad ay ku sameeyaan qiimeyntooda, waxaana lagu dhiirrigeliyaa iney wax la yaabi karaan, wax su`aali karaan iyo iney fikradohooda sabab u yeelaan isla markaasna ay dhageystaan fikirka dadka kale. Qaababka loo shaqeynayo oo kala duwan aawadeed, ardeydu waxey fursad u helaan iney dareemaan horumarka ay ku talowsadeen iyo waxa ay kororsadeen.

Qiimeynta iyo fikir uruurinta habsami usocodka waxbarashada ee maaddada diinta waxaa udub dhexaad u ah:

- Inuu ardeygu horumar ka muujin karo garashada iyo magacaabista falsafadaha ku hareereysan
- Inuu ardeygu horumar ka muujin karo xirfadaha wadashaqeynta
- Inuu ardeygu horumar ka muujin karo cabiridda/soo bandhigidda fikirkiisa iyo dhageysiga fikirka dadka kale.

Cadadka casharrada kala duwan ee ay maaddada diinta ka kooban tahay ee khuseeya fasallada 1-2

Sida uu dhigayo sharciga tacliinta aasaasiga ah qodobkiisa 11§:aad, maaddooyinka tacliinta aasaasiga ah waa iney kamid noqoto maaddada diinta ama cilmiga falsafadda nolosha. Isla sharcigaas qodobkiisa 13§:aad wuxuu qabaa in maaddada diinta ee ardeyda loo dhigayo ay waafaqsanaato diimaha ay aaminsan yihiin, maaddadaas oo ka kooban cutubyo casharro kala duwan ah. Si maaddada ay iskula jaanqaaddo, dhammaan waxbarashada maaddada diinta waxaa loo dajiyey ahdaaf iyo casharro udubdhexaad u ah maaddada.

Marka la dajinayo casharro ee ay maaddadu ka koobnaaneyso, ayaa la qeexaa inta cashar ee ka wada dhexeeya diimaha kala duwan, iyadoo la waafajinayo diinta uu ardeygu aaminsan yahay. Waxaa la dajiyaa manhajyo waxbarasho oo degmo walbo u gaar ah, kuwaasoo lagu kordhiso manhajka guud ee maaddada, iyadoo lasii qeexayo hadafka maaddada laga leeyahay iyo inta cashar ee ay diin walba maaddadeedu ka koobnaaneyso.

ISLAAM

Sawir kabixinta cadadka casharrada ee ay maddadan ka kooban tahay, ayaa waxaa lagu qeexayaa casharrada ay ka siman yihiin diimaha oo dhan. Manhajyada waxbarasho ee u goonida ah degmada, waxaa lagu sii qeexaa/sharxaa tirada casharro ee ay maaddadu ka koobnaaneyso iyo ahdaafta laga leeyahay maaddada diinta ee ku xusan manhajka guud ee waxbarashada.

S1 Xiriirka uu ardeygu la leeyahay diintiisa: Waxaa maaddadan lagu bartaa islaamka, iyadoo laga tusaale qaadanayo qoyska uu ardeygu kasoo jeedo. Waxaa si bilow/hordhac ah loo baranayaa xafladaha waaweyn ee islaamka iyo caadooyinka la xiriira marxaladaha nolosha ee qofka binu aadamka ah. Marka la xulanayo casharrda ay maaddadu ka koobnaaneyso, waxaa udubdhexaad u ah aasaaska diinta islaamka: Ilaahey inuu kali yahay, nebiyada, kutubta karaameysan, aaminaadda wax aan loo jeedin/ la arkin. Waxaa si hordhac ahaan ah loo dhigtaa Qur'aanka iyo axaadiista iyo bulshada islaamka ah. Waxaa la isla falanqeeyaa qeybaha kala duwan ee uu islaamku usii kala baxo iyo qiimaha uu masaajidku u leeyahay muslimiinta. Waxaa la isla gorfeeyaa waajibaadka saaran muslimiinta

S2 Diimaha caalamka: Waxaa la bartaa diimaha laga aaminsan yahay bulshada iskuulka iyo nawaaxigeeda, dhismayaashooda ay karaameeyaan, caadooyinka xafladaha iyo habka ay u dhaqmaan dadka aan diinta laheyn.

S3 Nolosha wanaagsan: Marka lagu gudajiro xulista casharrada maaddadan, waxaa udubdhexaad u ah marxaladda nololeed ee ay ardeydu ku sugan tahay iyo guud ahaan su`aalaha la xiriira nolosha. Mawduucyada casharrada aasaasiga ah waxaa kamid ah ixtiraamka nolosha, qiimaha uu binu aadamku leeyahay iyo xuquuqda nolosha. Waxaa la gorfeeyaa sidii uu ardeygu nafta qofka kale uga soo qaadi lahaa naftiisa oo kale. Waxaa la bartaa waajibaadka iyo xuquuqda uu islaamku siiyay shakhsiga xilliga uu kujiro nolosha qoyska. Waxaa la isla gorfeeyaa heshiiska xuquuqda carruurta ee qaramada midoobey iyo qiimaha uu u leeyayhay nolosha ardeyga. Casharrada la barto waxaa udub dhexaad u ah aasaaska nolosha wanaagsan ee islaamka. Waxaa intaas dheer oo la isla gorfeeyaa habdhaqanka qoyska ardeyga iyo tixgelinta kala duwanaanshaha.

Fasalka 1. aad

ISLAAM

Ahdaafta Fasalka 1. aad	S	u gaar ah degmada	L
T1 in ardeyga lagu dhaliyo xiise ku saabsan waxbarashada diinta iyo in tilmaamo laga siiyo sidii uu u aqoonsan lahaa aasaaska diinta ay qoyskiisu aaminsan yihiin	S1-S3	Barashada islaamka, iyadoo laga tusaale qaadanayo qoyska uu ardeygu kasoo jeedo	L2 L4
T2 in ardeyga lagu hago barashada siirada, astaamaha iyo arrimaha udubdhexaadka u ah diinta xiisadda lagu dhiganayo.	S1	Waxaa la bartaa noloshii (siirada) nabi Waxaa la bartaa micnaha ka diin yeelashada ama wax aaminista. Waxaa la bartaa waajibaadka ay diintu saartay dadka muslimka ah, arkaanta diinta Waxaa la bartaa aasaasiyaadka udubdhexaadka u ah diinta islaamka: Ilaahey inuu kali yahay, nabiyada, kitaabka karaameysan ee Qur'raanka, aaminista wax aan la arkin/loo jeedin. Waxaa la bartaa bulshada islaamka ah iyo micnaha loola jeedo ummad. Waxaa la bartaa qeybaha kala duwan ee uu islaamku usii kala baxo	L1
T3 in ardeyga lagu hago barashada habdhaqanka , xafladaha waaweyn iyo xilli sannadeedka ee diinta xiisadda lagu dhiganayo.	S1	Waxaa la isla gorfeeyaa habdhaqanka qoyska ardeyga. Waxaa la bartaa xafladaha waaweyn ee islaamka eid al-fitr iyo eid al-adha. Waxaa la bartaa caadooyinka la xiriira qaabka ay u wareegto nolosha muslimka.	L2 L7
T4 in ardeyga lagu dhiirrigeliyo barashada habdhaqanka iyo xafladaha ay leeyihiin diimaha iyo iyo caqiidooyinka kale ee laga aaminsan yahay fasalkiisa, iskuulkiisa iyo nawaaxiga uu ku nool yahay.	S2	Waxaa la bartaa diimaha saameynta ku leh bulshada iskuulka.	L2 L3 L7
T5 in ardeyga lagu gee-	S1	Waxaa tusaale ahaan laga wada sheekeystaa dareenka iyo fikradaha	L2

sinnimo galiyo inuu garto oo uu cabbiro fikirkiisa iyo dareenkiisa	S3	uu dareenku qofka ku dhaliyo, iyadoo lagu saleynayo Qur'aanka.	L6 L7
T6 in ardeyga lagu hago cadaaladfalka, sidii nafta qofka kale ugala mid dhigi lahaa naftiisa oo kale iyo sidii uu u ixtiraami lahaa fikirka iyo caqiidada qofka kale iyo guud ahaan xuquuda binu aadamka	S1-S3	Waxaa la gorfeeyaa sida loola macaamalo kala duwanaanshaha. Waxaa la gorfeeyaa xuquuqda carruurta. Waxaa lagu tababartaa sida nafta qofka kale looga soo qaado naftaada oo kale.	L2 L6 L7
T7 in ardeyga lagu hago inuu wax u gorfeeyo qaab akhlaaq ku dhisan, inuu dareemo micnaha ay leedahay inuu qofku masuuliyad iska saaro naftiisa, bulshada ku hareereysan, deegaanka iyo bey`ada	S3	Waxaa la bartaa waajibaadka iyo xuquuqda reerka ee saaran ilmaha muslimka ah.	L3 L7
T8 in ardeyga loo abuuro jawi iyo fursad uu ku tababarto habka uu fikirkiisa usoo jeedin karo kuna sababeyn karo iyo sidoo kale dhageysiga iyo fahamka fikradaha kala duwan	S1 S3	Waxaa laga wada sheekeystaa arrimaha ku saabsan dareenka iyo micnaha loola jeedo khalad iyo sax.	L1 L5 L6 L7

Fasalka 2. aad

ISLAAM

TURKU

Ahdaafta fasalka 2. aad	**S**	**u gaar ah degmada**	**L**
T2 in ardeyga lagu hago barashada siirada, astaamaha iyo arrimaha ududbdhexaadka u ah diinta xiisadda lagu dhiganayo.	S1	Waxaa la bartaa qaar kamid ah suuradaha gaagaaban ee Qur'aanka iyo micnehooda. Waxaa tababar loo qaataa isticmaalka Qur'aanka. Waxaa la bartaa axaadiista nebi Muhammed iyo sunnadiisa. Waxaa la bartaa kutubta kale ee karaameysan ee islaamka; Sahifa, Tawra, Zabur ja Injil. Waxaa la bartaa siiradii anbiyada (tusaale *ahaan. sheekooyinkii anbiyada ay kamidka yihiin Aadam, Nuux, Ibraahiim iyo Ismaaciil*).	L1
T3 in ardeyga lagu hago	S1	Waxaa la is tusaaleeyaa oo la bartaa salaadda.	L2

barashada habdhaqanka , xafladaha waaweyn iyo xilli sannadeedka ee diinta xiisadda lagu dhiganayo.		Waxaa si qotodheer loo gudagalaa macluumaadka ku saabsan waajibaadka saaran qofka muslimka ah, arkaanta islaamka marka laga eego dhanka isbedelka xillisannadeedka. Waxaa la bartaa jadwalka islaamka. Waxaa la bartaa karaamada uu leeyahay dhismaha masaajidka.	L7
T4 in ardeyga lagu dhiirrigeliyo barashada habdhaqanka iyo xafladaha ay leeyihiin diimaha iyo iyo caqiidooyinka kale ee laga aaminsan yahay fasalkiisa, iskuulkiisa iyo nawaaxiga uu ku nool yahay.	S2	Waxaa la bartaa diimaha laga aamisan yahay nawaaxiga uu ardeygu kunool yahay, goobohooda ay wax ku caabudaan ee karaameysan iyo xafladohooda waweyn. Waxaa la bartaa habdhaqanka dadka diin la`aanta ah.	L2 L3 L7
T5 in ardeyga lagu geesinnimo galiyo inuu garto oo uu cabbiro fikirkiisa iyo dareenkiisa	S1 S3	Waxaa tusaale ahaan laga wada sheekeystaa dareenka iyo fikradaha uu dareenku qofka ku dhaliyo, iyadoo lagu saleynayo Qur'aanka iyo axaadiista nebiga.	L2 L6 L7
T6 in ardeyga lagu hago cadaaladfalka, sidii nafta qofka kale ugala mid dhigi lahaa naftiisa oo kale iyo sidii uu u ixtiraami lahaa fikirka iyo caqiidada qofka kale iyo guud ahaan xuquuda binu aadamka	S1-S3	Waxaa la bartaa heshiiska qaramada midoobay ee ku saabsan xuquuqda carruurta iyo qiimaha uu u leeyahay nolosha ardeyga. Waxaa lagu tababartaa, sida nafta qofka kale looga soo qaado naftaada oo kale.	L2 L6 L7
T7 in ardeyga lagu hago inuu wax u gorfeeyo qaab akhlaaq ku dhisan, inuu dareemo micnaha ay leedahay inuu qofku masuuliyad iska saaro naftiisa, bulshada ku hareereysan, deegaanka iyo bey`ada	S3	Waxaa la bartaa aasaasiyaadka nolosha wanaagsan ee islaamka. Waxaa la isla falanqeeyaa mawduucyo ku saabsan tixgelinta nolosha: tusalee ahaan qiimaha binu aadamka iyo aqbalidda iyo u qalbifurnaanshaha dadka kale, masuuliyadda qofka ka saaran bey`ada iyo deegaanka.	L3 L7
T8 in ardeyga loo abuuro jawi iyo fursad uu ku tababarto habka uu fikirkiisa usoo jeedin karo kuna sababeyn karo iyo sidoo kale dhageysiga iyo fahamka fikradaha kala duwan	S1 S3	Waxaa laga wada sheekeystaa arrimaha ku saabsan dareenka iyo micnaha loola jeedo khalad iyo sax.	L1 L5 L6 L7

Manhajka waxbarashada tacliinta aasaasiga ah ee Turku cutubka 14: aad fasallada 3-6

14.4.6 DIINTA

Hadafka laga leeyahay maaddada

Hadafka laga leeyahay maaddada diinta, waa iney siiso ardeyga ilbaxnimo diimeed ballaaran oo ku saleysan fals a-fad sugan. Waxbarashadan waxey ardeyda ku carbineysaa maaddada diinta ee markaas la baranayo iyo qeybaha ay u kala baxdo. Waxey maaddadan ardeyga bareysaa diinta iyo caadooyinka falsafadeed ee ka jira Finland iyo sidoo kale diimaha iyo falsafadaha kale ee ka jira guud ahaan caalamka intiisa kale. Maaddadu waxey horuma-rineysaa fahanka xiriirka ka dhexeeya diinta iyo dhaqanka, waxeyna bareysaa ardeyga xeelad xog ururin, taasoo ku saabsan diimaha iyo falsafadaha kala duwan. Waxbarashadu waxey ardeyga aqoon kala duwan ka siineysaa diimaha, taasoo ka caawin doonta inuu fahmo guud ahaan wadaxaaajoodka/wada hadalka laga galo diimaha. Waxaa ardeyga lagu hagayaa inuu u fekero qaab uu maskaxdiisa ade egsanayo waxna isku weydiinkaro iyo inuu ka eego/fiirsho diimaha dhinacyo kala duwan. Inta lagu gudajiro waxbarashadan, waxaa lagu falanqeynayaa xiriirka ka dhexeeya cilmiga iyo diinta iyo sidoo kale luuqadda u goonida ah diimaha, sida marka laga hadlayo astaamaha lagu kala garto diimaha iyo ereybixinnada diimaha. Waxbarashada xiisadda diinta waxey carbis u tahay wada xaajodka/wada hadalka ka dhexeeya diimaha iyo falsafadaha kala duwan ee nolosha ama wadaxaajoodka ka dha-caya diinta iyo falsafadda gudeheeda. Waxbarashadan waxey ardeyga ku dhiirrigelineysaa inuu ixtiraamo nolosha, qiimaha binu aadamku leeyahay iyo waxyaalaha agtiisa ama dadka kale agtooda ka karaameysan/barakeysan.

Waxbarashada xiisadda diinta waxaa lagu darsayaa, hab akhlaaqeedka looga fekero diinta ay xiisaddu khuseyso iyo diimaha iyo falsafadaha kale ee jira. Sidoo kale waxaa ardeyda lagu bogaadinayaa iney dhankooda ka fekeraan su`aalaha akhlaaqdda ku saabsan. Waxbarashadan waxey saacideysaa aqoonta uu ardeygu u leeyahay naftiisa, ixtiraamka uu naftiisa u hayo iyo koboca iskufillaanshaha nololeed muddada uu dhiganayo tacliinta aasaasiga ah. Waxbarashadan waxey ardeyga sahay u siineysaa dhisidda iyo qiimeynta shakhsiyaddiisa, falsafaddiisa nolosha iyo aragtida uu ka aaminsan yahay caalamka intiisa kale. Waxbarashada xiisadda diintu, waxey ardeyga ka kaa l-meyneysaa koboca dhinaca bulshada iyo sidii uu ku noqon lahaa xubin xilkas ah oo ka mid ah bulsha da dimuqraa-diga ah iyo sidii uu ardeygu ku noqon lahaa shakhsi hab caalami ah u fekera.

Fasallada 3-6 Waxbarashada xiisadda diinta, waxaa lagu ballaariyaa oo si qotodheer hoos loogu dhaadhacaa, aqoonta aasaasiga ee uu ardeygu u leeyahay diintiisa. Waxaa lagu bartaa kutubta karaameysan ee diintaas iyo sidoo kale siirada, nuxurka, akhlaaqda, mawqifka, caadooyinka iyo dhaqanka ay leedahay diinta xilligaas xiisadda lagu dhiganayo. Ardeyda waxaa lagu bogaadiyaa iney wax la yaabaan oo ay wax is weydiiyaan. Xiisadda waxaa lagu bartaa asalka diimihii hore uga jiri jirey Finland iyo Yurub, waxaana sidoo kale lagu bartaa diinta iyo falsafa d-da nolosha ee xilligan ka jirta Finland iyo guud ahaan Yurub. Ardeyda waxey hantaan xeelad ay ilaha warbaahinta uga faa'iidystaan, waxaana lagu hagaa sidii ay u qiimeyn lahaayeen ugana faa'iideysan lahaayeen macluumaadka ay kasoo uruuruyeen ilaha kala duwan ee warbaahinta.

Waxbarashada xiisadda waxaa lagu falanqeeyaa xuquuqda ay carruurtu leeyihiin iyo masuuliyadda sh akhsiga ka saaran falalka uu geysto. Waxbarashadan waxaa lagu tababartaa sidii uu ardeygu u xakameyn lahaa dareenkiisa, waxaana lagu kasbadaa xeeladda la macaamalka dadka kale. Waxaa ardeyga laga saacidaa sidii uu u cabbiri lahaa una sababeyn lahaa aragtidiisa. Ardeyda waxaa dhiirrigeliya xiriirka saaxiibtinnimada, dhisidda bulsho iskuul oo hagaagsan iyo kahortagga liididda iyo cunsuriyadda.

Ahdaafta laga leeyahay waxbarashada diinta ee fasallada 3-6

Ahdaafta waxbarasho	Cutubyada la xiriira ah-daafta	Aqoon u yeelasho ballaa-ran
T1 in ardeyga lagu hago sidii uu fikir uga qaadan lahaa diinta xiisadda lagu dhiganayo kutubteeda karaameysan, siiradeeda iyo aqoonta udubdhexaadka u ah diintaas	S1	L1
T2 in ardeyga lagu hago barashada habdhaqanka ay lee-dahay diinta ay xiisaddu khuseyso iyo sidoo kale goobe-heeda iyo dhismayaasheeda barakeysan	S1	L1, L2
T3 in ardeyga laga caawiyo sidii uu ku aqoon lahaa ereybi-xinta diinta iyo astaameheeda u goonida ah	S1, S2	L2, L3, L4
T4 in ardeyga lagu hago habkii uu u raadin lahaa, u qii-meyn lahaa una isticmaali lahaa xogta khuseysa diinta ee laga soo uruuriyey ilaha kala duwan	S1, S2, S3	L4, L5, L6
T5 in ardeyga tilmaamo laga siiyo sidii uu fikir uga qaadan lahaa asalka diimaha iyo caqiidooyinka horey uga jirey Finland iyo Yurub iyo xaaladda hadda jirta	S1, S2	L1, L2
T6 in ardeyga lagu hago barashada diimaha yuhuudda, kiristaanka iyo islaamka iyo saameynta iyo taariikhda ay diimahaasi Yurub ku leeyihiin	S2, S3	L2
T7 in ardeyga lagu dhiirrigeliyo ixtiraamka karaamadiisa iyo tan dadka kale una dhaqmo si tixgelin leh, marka uu ka qeybqaadanayo kulamada iyo isu immaatinnada diimaha	S1, S2, S3	L2, L5, L6
T8 in ardeyga lagu hago sidii uu fikir uga qaadan lahaa akhlaaqda khuseysa diinta xiisadda lagu dhiganayo iyo akhlaaqiyaadka kale ee ay diimuhu ka siman yihiin	S1, S2, S3	L7
T9 in ardeyga lagu hago fahanka xuquuqda binu aadamka iyo khaas ahaan qiyamka shakhsiga iyo bulshada ee ku qeexan heshiiska xuquuqda carruurta ee qaramada mi-doobey	S2, S3	L2
T10 in ardeyga lagu hago sidii uu u qiimeyn lahaa falalka uu xushey inuu sameeyo iyo inuu u miisaamo saameyn-tooda qaab sugan oo ay akhlaaq ku dhisan tahay	S2, S3	L1, L3, L6
T11 in ardeyga la siiyo fursad uu kaga xaajoon karo su`aalaha khuseeyo akhlaaqda iyo sidii uu fikirkiisa iyo dareenkiisa ugu cabbiro hab ku saleysan wax dhisid iyo sidoo kale inuu sababeyn karo aragtidiisa.	S1, S2, S3	L1, L4, L6, L7
T12 in ardeyga laga caawiyo sidii uu ku kasban lahaa kuna xoojin lahaa isku kalsooni buuxda, sawir hagaagsan inuu caalamka ka heysto iyo guud ahaan kalsoonida uu ku qabo nolosha	S3	L1

Mawduucyada iyo casharrada udubdhexaadka u ah ahdaafta xiisadda diinta ee fasallada 3-6

Mawduucyada lagu baranayo xiisada diinta xulashadooda iyo dejintooda waxaa lagu saleeyaa hadafka guud ee laga leeyahay maaddada iyo qaabka loo gaari karo hadafkaas. Marka la dooranayo mawduucyada iyo casharradooda xiisadda lagu dhigayo, waxaa laga faa'i
ideystaa fursada ka jira deegaankaas. Fasallada waxaa loo dajiyaa cutubyo iyo casharro kaamil ah oo ku saleysan heerka fasalka uu ardeyga marayo. Marka la dajinayo cutubyada casharrada fasal walba, waxaa la tixgeliyaa heerka aqoonta ardeyga iyo khibradda uu ka heysto caalamka.

S1 Xiriirka uu ardeygu la leeyahay diintiisa: Casharradan waxaa xoogga lagu saaraa meelaha diinta laga soo xigtay, kutubta iyo shakhsiyaadka karaameysan, muusikada, astaamaha, goobaha iyo dhismayaasha cibaadada. Mawduucyada ugu muhiimsan waxaa ka mid ah cilmiga diinta, qaababka iyo hab dhaqameedka, bulshada iyo caadooyinkeeda iyo kala duwananaanshaha diinta dhexdeeda ka jirta. Waxaa la hubsadaa farriimaha aasaasiga ah ee ay diintaas xambaarsan tahay iyo xiriirka kala dhexeeya cilmiga, suugaanta iyo dhaqanka.

S2 Diimaha caalamka: Mawduucyada casharradan waxey khuseeyaan diinta kiristaanka, diimaha kale iyo diin la`aanta, iyadoo laga fiirinayo dhinaca dhaqanka iyo nolol maalmeed bulshada finishka ah. Waxaa si khaas ah loo bartaa diimaha iyo goobaha cibaadada ee bulshada/jaaliyadaha saameynta ku leh deegaanka iskuulka ka agdhow. Casharradan waxaa fikir laga qaataa asalka diimaha iyo caqiidooyinka horey uga jirey Finland iyo Yurub iyo xaaladda hadda jirta. Casharrada waxaa lagu xushaa hab uu ardeyga fikir guud ka qaadanayo diimaha Yurub ka jira asalkooda iyo qiimaha ay ku fadhiyaan, khaas ahaan diimaha yuhuudda, kiristaanka iyo islaamka. Marka lagu gudajiro xulashada casharrada laga dhiganayo, waxaa la tixgeliyaa habka ay warbaahinta iyo dhaqanka guud ee bulshadu u falanqeeyaan mawduucyada ku saabsan diintaas.

S3 Nolosha wanaagsan: Mawduucyada casharradan udubdhexaadka u ah waa qiimaha binu aadamka, tixgelinta nolosha iyo dhowrista bey`ada. Waxaa la gorfeeyaa waxyaalaha uu ardeygu iskiis u xusho/doorto iyo qiyamka saameynta ku leh doorashadiisa iyo sidoo kale xil iskasaarista caalamka. Casharrada muhiimka ah waxaa kamid ah xirfadaha nolosha, aqoonta uu ardeygu naftiisa u leeyahay, niyadsami iyo caafimaadqab dhameystiran. Waxaa la bartaa akhlaaqda ay fareyso diinta xiisadda lagu dhiganayo iyo fikradaha akhlaaqeed ee ka wada dhexeeya diimaha iyo caqiidooyinka kale. Waxaa la falanqeeyaa heshiiska xuquuqda carruurta ee qaramada modoobay. Caharradu waxey ardeyga sahay u siinayaan wada sheekeysiga diinta iyo akhlaaqda ku saabsan iyo sababeynta aragtidiisa u gaarka ah.

Ahdaafta la xiriirta deegaanka lagu baranayo iyo habka loo baranayo maaddada diinta ee khuseysa fasallada 3-6

Qaabka wax loo baranayo wuxuu ku saleysan yahay hab ka sheekeyn, jilitaan, tijaabin, camali iyo hab wadajir ku dhisan. Waxaa udubdhexaad ah in marka hore si hordhac ah loo falanqeeyo arrimaha la baranayo. Xiisadda diinta, waxaa loo adeegsadaa barnaamijyo kumbiyuutar la adeegsanayo oo horumarinayo fahanka casharrada, kuwaaso muujinaya firfircoonida iyo wada macaamalka ardeyda dhexdooda. Waxaa xoogga la saaraa in si aan degdeg laheyn wax loo falanqeeyo iyo wadasheekeysi ka dhexdhaca ardeyda dhexdooda. Waxaa waxbarashada loo adeegsan karaa booqashooyin lagu tago meelo kale iyo in dad lagu martigeliyo xiisadda, taasoo lagu saleynayo fursadda jirta. Waxaa xiisadda dhexdeeda lagaga shaqeyn karaa mashaariic ay ardeydu wada fulinayaan iyo kuwa kelikeli ah, kuwaasoo ka dhexeyn kara cutubyada casharra u degsan maaddada ama maaddooyin kale oo aan ku tacalluqin diinta. Hadafku waa in si ixtiraam ku jiro loo muujiyo diimaha iyo falsafadaha nolosha ee ay matalayaan ardeyda dhigata iskuulka.

Hagitaan, tixgelinta baahida iyo kaladuwanaanshaha ardeyda iyo ka taakuleynta maaddada diinta ee fasallada 3-6

Marka la dhaqangelinyo dhigashada cutubyada casharro ee maaddadan, waxaa tixgelin gaar ah la siiyaa diinta iyo caqiidada ee uu ardeygu kasoo jeedo iyo heerka ay mareyso aqoontiisa luuqadda. Waxaa laga caawiyaa fahanka mawduucyada aasaasiga ah. Intey xiisaddu socoto, waxaa la abuuraa xaalad lagu hormarinayo waxbarashada iyo ka qeybqaadashada xiisadda ee ardeyga. Waxaa la hagaa lana xoojiyaa xirfadaha waxbarasho ee ardeyga. Waxaa la dardargeliyaa firfircoonida ardeyga.

Qiimeynta heerka aqoonta ardeyga ee maaddada diinta ee fasallada 3-6

Habka qiimeynta aqoonta ardeygu waa mid ku saleysan hagitaan iyo dhiirrigelin. Fikir ka ururinta ardeyda waa mid lagu hiigsanayo dhiirrigelin iyo inuu ardeygu ka salgaaro ilaha laga helo xogta diimaha iyo sidoo kale in uu ardeyga fahan ka qaato arrimaha kala duwan ee hor imman kara. Marka la qiimeynayo aqoonta ardeyga, waxaa la tixgeliyaa siyaabaha kala duwan ee uu ardeygu ku muujin karo aqoontiisa sida habka qoraalka, oraahda, jilitaanka iwm. Muhiimaddu waa inuu ardeygu karti u leeyahay inuu cabbiro fikirkiisa. Waxaa si gaar ah mudnaanta loo siiyaa habka uu ardeygu ku dhaqangelin karo waxa uu bartay iyo koboca fikirkiisa.

Marka uu macallinku siinayo ardeyga natiijo nambar ama xaraf u dhiganta, waxaa uu macallinku qiimeynayaa, sida ay heerka aqoonta ardeygu u gaartay hadafka u dagsan maaddada ee ku xusan manhajka waxbarashada ee deegaankaas. Marka uu macallinku cabbirayo natiijada heerka aqooneed ee shahaadada fasal ka 6.aad, wuxuu macallinku isticmaalaa qaababka loo qiimeeyo maaddada diinta ee waddanka oo dhan u degsan.

Sawir ka bixin natiijada nambarka/xarafka ah iyo qaababka loo qiimeeyo heerka aqoonta wanaagsan ee maaddada diinta ee dhammaadka fasalka 6.aad.

Ahdaafta	**Cutubyada**	**Qeybta ay qiimeyntu khuseyso**	**Wanaagsan / aqoon u dhiganta siddeed**
T1 in ardeyga lagu hago sidii uu fikir uga qaadan lahaa diinta xiisadda lagu dhiganayo kutubteeda karaameysan, siiradeeda iyo aqoonta udubdhexaadka u ah diintaas	S1	Xakameynta aqoonta khuseysa diinta, in diinta laga fiirsho dhinacyo kala duwan	Ardeygu wuu garanayaa ilaha laga soo xigto qoraallada diinta xiisadda lagu baranayo iyo arrimaha udubdhexaadka u ah diintaas.
T2 in ardeyga lagu hago barashada habdhaqanka ay leedahay diinta ay xiisaddu khuseyso iyo sidoo kale goobeheeda iyo dhismayaasheeda barakeysan	S1	Xakameynta aqoonta khuseysa diinta, in diinta laga fiirsho dhinacyo kala duwan	Ardeygu wuu garanayaa inuu tusaale ka bixiyo caadooyinka, dhaqamada iyo goobaha cibaadada ee diinta xiisadda lagu baranayo iyo qiimaha ay ku fadhiyaan.
T3 in ardeyga laga caawiyo sidii uu ku aqoon lahaa ereybixinta diinta iyo astaameheeda u goonida ah	S1, S2	Miisaamidda nuxurka luuqadda iyo astaamaha ay diintu leedahay	Ardeygu wuu garanayaa inuu tusaale ka bixiyo erebixinnada u goonida ah diinta iyo is barbardhiggooda
T4 in ardeyga lagu hago habkii uu u raadin lahaa, u qiimeyn lahaa una isticmaali lahaa xogta khuseysa diinta ee laga soo	S1, S2, S3	Barashada xeelada wax loo barto ee khuseeya xiisadda	Ardeygu wuu garanayaa inuu ilo kala duwan xog kasoo ururiyo. Ardeygu wuxuu ku

uruuriyey ilaha kala duwan		diinta	tababaranayaa qiimeynta iyo hufnaanta xogta uu soo ururiyey.
T5 in ardeyga tilmaamo laga siiyo sidii uu fikir uga qaadan lahaa asalka diimaha iyo caqiidooyinka horey uga jirey Finland iyo Yurub iyo xaaladda hadda jirta	S1, S2	Aqoonta ku saabsan diinta iyo dhaqanka	Ardeygu wuu aqoonsan karaa qiimaha ay diimuhu ku leeyihiin horumarka bulshada, dhaqanka iyo warbaahinta, tusaale ayuuna arrimahaas ka bixin karaa. Ardeygu sawir guud ayuu ka bixin karaa aasaaska diimaha ka jiri jirey Finland iyo guud ahaan Yurub.
T6 in ardeyga lagu hago barashada diimaha yuhuudda, kiristaanka iyo islaamka iyo saameynta iyo taariikhda ay diimahaasi Yurub ku leeyihiin	S2, S3	Aqoonta ku saabsan diinta iyo dhaqanka	Ardeygu wuxuu sawir guud ka bixin karaa diimaha yuhuudda, kiristaanka iyo islaamka iyo xiriirka ka dhexeeya.
T7 in ardeyga lagu dhiirrigeliyo ixtiraamka karaamadiisa iyo tan dadka kale una dhaqmo si tixgelin leh, marka uu ka qeybqaadanayo kulamada iyo isu immaatinnada diimaha	S1, S2, S3	In diinta laga fiiriyo dhinacyo kala duwan	Ardeygu wuu garanayaa habka loogu dhaqmo si ixtiraam kujrio marka uu ku sugan yahay goobaha iyo xaaladaha diiniga ah.
T8 in ardeyga lagu hago ka salgaarista akhlaaqda khuseysa diinta xiisadda lagu dhiganayo iyo akhlaaqiyaadka kale ee ay diimuhu ka siman yihiin	S1, S2, S3	Aqoonta ku saabsan akhlaaqda	Ardeyga wuu garan karaa, wuuna magacaabi karaa farriimaha akhlaaqeed ee ay xambaarsan tahay diinta xiisadda lagu baranayo iyo mabaadi`da ka wada dhexeysa diimaha iyo falsafadaha nolosha.
T9 in ardeyga lagu hago fahanka xuquuqda binu aadamka iyo khaas ahaan qiyamka shakhsiga iyo bulshada ee ku qeexan heshiiska xuquuqda carruurta ee qaramada midoobey	S2, S3	Akhlaaqda xuquuqda binu aadamka	Ardeygu wuu garanayaa farriinta aasaasiga ah uu xambaarsan yahay heshiiska xuquuqda carruurta ee hay`adda qaramada midoobey. Ardeygu tusaale ayuu ka bixin karaa xuquuqda binu aadamka.
T10 in ardeyga lagu hago sidii uu u qiimeyn lahaa falalka uu xushey inuu sameeyo iyo inuu u miisaamo saameyntooda qaab sugan oo ay akhlaaq ku dhisan tahay	S2, S3	Ka fiirsasha akhlaaq ku saleysan	Ardeygu wuxuu tusaale fudud ka bixin karaa habka loo dhisi karo horumar waara. Wuxuu dhaqan gelin karaa aqoonta akhlaaqeed ee uu xiisada ka bartey, marka uu wax ka fiirsanayo/ka fekerayo.
T11 in ardeyga la siiyo fursad uu kaga xaajoon karo su`aalaha khuseeyo akhlaaqda iyo sidii uu fikirkiisa iyo dareenkiisa ugu cabbiro hab ku saleysan wax dhisid iyo sidoo kale inuu sababeyn karo aragtidiisa	S1, S2, S3	Xeeladaha fikirka iyo la macaamalka dadka kale	Ardeygu wuu ka qeybqaataa wadasheekeysiga ka dhacaya fasalka, wuxuu garanayaa dhageysiga ardeyda kale, wuxuuna cabbiri karaa aragtidiisa.

T12 in ardeyga laga caawiyo sidii uu ku kasban lahaa kuna xoojin lahaa isku kalsooni buuxda, sawir hagaagsan inuu caalamka ka heysto iyo guud ahaan kalsioonida uu ku qabo nolosha	S3		Saameyn kuma lahan natiija-da uu ardeygu helayo. Waxaa ardeyda lagu hagaa iney khibraddooda ka fekeraan si ay naftooda u qiimeyn ka-raan.

Cadadadka casharrada kala duwan ee ay maaddada diinta ka kooban tahay ee khuseeya fasallada 3-6

Sida uu dhigayo sharciga tacliinta aasaasiga ah qodobkiisa 11§:aad, maaddooyinka tacliinta aasaasiga ah waa iney kamid noqoto maaddada diinta ama cilmiga falsafadda nolosha. Isla sharcigaas qodobkiisa 13§:aad wuxuu qabaa in maaddada diinta ee ardeyda loo dhigayo ay waafaqsanaato diimaha ay aaminsan yihiin, maaddadaas oo ka kooban cutubyo casharro kala duwan ah. Si maaddada ay iskula jaanqaaddo, dhammaan waxbarashada maadda-da diinta waxaa loo dajiyey ahdaaf iyo casharro udubdhexaad u ah maaddada.

Marka la dajinayo casharro ee ay maaddadu ka koobnaaneyso, ayaa la qeexaa inta cashar ee ka wada dhexeeya diimaha kala duwan, iyadoo la waafajinayo diinta uu ardeygu aaminsan yahay. Waxaa la dajiyaa manhajyo wax-barasho oo degmo walbo u gaar ah, kuwaasoo lagu kordhiso manhajka guud ee maaddada, iyadoo lasii qeexayo hadafka maaddada laga leeyahay iyo inta cashar ee ay diin walba maaddadeedu ka koobnaaneyso.

ISLAAM

Sawir kabixinta cadadka casharrada ee ay maaddadan ka kooban tahay, ayaa waxaa lagu qeexayaa casharrada ay ka siman yihiin diimaha oo dhan. Manhajyada waxbarasho ee u goonida ah degmada, waxaa lagu sii qee-xaa/sharxaa tirada casharro ee ay maaddadu ka koobnaaneyso iyo ahdaafta laga leeyahay maaddada diinta ee ku xusan manhajka guud ee waxbarashada.

S1 Xiriirka uu ardeygu la leeyahay diintiisa: Waxbarashada islaamka waxaa udubdhexaad u ah Qur'aanka, axaa-diista iyo aasaaska cilmiga islaamka. Xiisadda waxaa diiradda lagu saaraa saameynta uu dhaqanka islaamku ku leeyahay nakhshadeynta, dhaqanka iyo suugaanta. Waxaa la bartaa saameynta uu islaamku ku yeeshay caalamka xilligii, iyadoo laga faa'iideysanayo raadkii suugaanta Giriiggii hore. Waxaa la tixgeliyaa oo casharrada lagu soo qaataa goobaha barakeysan ee islaamka iyo qiimaha ay leeyihiin. Marka la dajinayo casharrada, waxyaabaha m u-hiimka ah waxaa kamid ah, sheekooyinka iyo tacliinta dhaxalgalka ah ee casrigan ku aaddan ee uu islaamku jide e-yey. Waxaa la bartaa astaamaha diinta lagu garto, xafladaha waaweyn ee ay leeyihiin iyo jadwalka islaamiga ah. Marka la dejinayo casharrada, waxaa la tixgeliyaa luuqadda iyo ereybixinta goonida u ah diinta iyo saameynta ay ku leedahay caalamka islaamka. Waxaa la dhigtaa kala duwanaanta islaamka gudihiisa ka jirta. Waxaa la baartaa sheekooyinka nabiyada iyadoo laga eegayo dhinaca faafista islaamka. Casharrada waxaa lagu bartaa taariikhda islaamu ku leeyahy Yurub iyo islaamka Finland ka jira.

S2 Diimaha caalamka: Casharradan waxaa udubdhexaad u ah diimaha yuhuudda, kiristaanka iyo islaamka. Waxaa la gudagalaa waxyaalaha ay wadaagaan ee ka wada dhexeeya sida anbiyada, goobaha cibaadada iyo qoraallada karaameysan. Waxaa wax laga baaraa saameynta ay diimaha yuhuudda, kiristaanka iyo islaamku ku leeyihiin dh a-qanka reer Yurub. Wabarashadu intey socoto, waxaa la tixgeliyaa oo casharrada lagu soo qaataa, diimaha ay aa-minsan yihiin jaaliyada saameynta ku leh Finland. Waxaa sidoo kale casharrada lagu dhigtaa qiimaha uu leeyahay wadaxaajoodka diimaha ka dhexeeya iyo xiriirka ka dhexeeya diinta iyo warbaahinta iyo dhaqanka ay bulshadu u badan tahay. Waxaa casharrada lagu soo qaataa doorka ay diimuhu ku leeyihiin sugidda ammaanka caalamka.

S3 Nolosha wanaagsan: Waxbarashada xiisadda waxaa lagu soo qaataa aasaaska akhlaaqda islaamka iyo qiyamka nolosha. Waxaa la gudagalaa arrimaha uu islaamku mamnuucay ama oggolaadey iyo waxyaalaha lagu dambaabo. Waxaa xiisadda lagu gorfeeyaa xiriirka ka dhexeeya dadka iyo bey`ada iyo masuuliyada qofka ka saaran caalamka. Casharrada muhiimka ah waxaa kamid ah, xuquuqda uu qofku u leeyahay nolosha iyo heshiiska xuquuqda carruurta ee qaramada midoobey. Waxaa xiisadda lagu gorfeeyaa xiriirka ka dhexeeya aaminaadda iyo camalka, hab dhaqanka islaamiga ah, xeeladda nololwanaagga/gaboodfalka iyo su`aalaha ku saabsan akhlaaqda ee ka yimaadda nolosha ardeyda.

Fasalka 3. aad

ISLAAM

TURKU

Ahdaafta fasalka 3. aad	**S**	**u gaar ah degmada**	**L**
T1 in ardeyga lagu hago sidii uu fikir uga qaadan lahaa diinta xiisadda lagu dhiganayo kutubteeda karaameysan, siiradeeda iyo aqoonta ududbdhexaadka u ah diintaas	S1	Waxaa la bartaa noloshii nebi Maxammed iyo taariikhdii uu islaamku ku bilowday. Waxaa la bartaa aasaaska diinta; ballaarinta aqoonta arkaanta iimaanka, dambidhaafka/cafiska, jaceylka ilaahey iyo waxyaalaha u goonida ah ilaahey.	L1
T2 in ardeyga lagu hago barashada habdhaqanka ay leedahay diinta ay xiisaddu khuseyso iyo sidoo kale goobeheeda iyo dhismayaasheeda barakeysan	S1	Waxaa la gudagalaa xafladaha la xiriira nolosha muslimka. Waxaa la bartaa in astaanta bisha ay summad ududbdhexaad ah u tahay islaamka	L1 L2
T3 in ardeyga laga caawiyo sidii uu ku aqoon lahaa ereybixinta diinta iyo astaameheeda u goonida ah	S1 S2	Waxaa laga wada sheekeystaa arrimaha u goonida ah ee lagu garto luuqadda Qur'aanka iyo is barbardhiggooda. Waxaa la bartaa fahanka erayada ududbdhexaadka u ah islaamka (tusaale. tawxiid iyo shirki).	L2 L3 L4
T4 in ardeyga lagu hago habkii uu u raadin lahaa, u qiimeyn lahaa una isticmaali lahaa xogta khuseysa diinta ee laga soo uruuriyey ilaha kala duwan	S1 S2 S3	Waxaa lagu tababartaa isticmaalka quraanka. Waxaa laga wada sheekeystaa doorka uu quraanku ku leeyahay tarbiyada iyo jaangoynta nolosha iyo inuu yahay asalka shareecada. Waxaa la bartaa qeybaha quraanka ee ka hadlaya arkaanta iimaanka.	L4 L5 L6
T7 in ardeyga lagu dhiirrigeliyo ixtiraamka karaamadiisa iyo tan dadka	S1 S2 S3	Waxaa ardeyda lagu hagaa iney bartaan micnaha loola jeedo barakada/karaamada. Waxaa ardeyda lagu bogaadiyaa iney ka fekeraan qiimaha karaa-	L2 L5 L6

kale una dhaqmo si tix-gelin leh, marka uu ka qeybqaadanayo kulama-da iyo isu immaatinnada diimaha		madu u leedahay shakhsiga iyo bulshada. Waxaa la isla gorfeeyaa qiimaha ay leedahay iilbaxnimada aqba-laadda ku saleysan.	
T8 in ardeyga lagu hago ka salgaarista akhlaaqda khuseysa diinta xiisadda lagu dhiganayo iyo akh-laaqiyaadka kale ee ay diimuhu ka siman yihiin	S1 S2 S3	Waxaa la bartaa hab dhaqanka islaamiga ah. Waxaa la isla gorfeeyaa miucnaha loola jeedo dambaabidda.	L7
T9 in ardeyga lagu hago fahanka xuquuqda binu aadamka iyo khaas ahaan qiyamka shakhsi-ga iyo bulshada ee ku qeexan heshiiska xu-quuqda carruurta ee qaramada midoobey	S2 S3	Waxaa la isla gorfeeyaa xuquuqda binu aadamka iyo qiimaha uu aadamuhu leeyahay. Waxaa la isla gorfeeyaa sida loola tacaalo kala duwanaanshada dadka, iyadoo laga eegayo dhanka binu aadannimada.	L2
T10 in ardeyga lagu hago sidii uu u qiimeyn lahaa falalka uu xushey inuu sameeyo iyo inuu u miisaamo saameyntooda qaab sugan oo ay akh-laaq ku dhisan tahay	S2 S3	Waxaa la isla falanqeeyaa mawduucyada ku saabsan badqabka ar-deyga, bulshadiisa iyo jiilka mustaqbalka. (tusaale ahaan dhowrista bey`ada, horumarka waara, ixtiraamka dadka kale, samafalka, cad-daaladfalka iyo daneynta danta guud).	L1 L3 L6
T11 in ardeyga la siiyo fursad uu kaga xaajoon karo su`aalaha khuseeyo akhlaaqda iyo sidii uu fikirkiisa iyo dareenkiisa ugu cabbiro hab ku sale-ysan wax dhisid iyo sidoo kale inuu sababeyn kari aragtidiisa	S1 S2 S3	Waxaa laga wada sheekeystaa tusaale ahaan dareenka iyo qiyamka, khaladka iyo saxda iyo nolosha wanaagsan, iyadoo lagu saleynayo Qur'aanka iyo axaadiista.	L1 L4 L6 L7
T12 in ardeyga laga caa-wiyo sidii uu ku kasban lahaa kuna xoojin lahaa isku kalsooni buuxda, sawir hagaagsan inuu caalamka ka heysto iyo guud ahaan kalsoonida uu ku qabo nolosha	S3	Waxaa laga wada sheekeystaa ixtiraamka nafta iyo qiimaha shakh-siyadda qofka. Waxaa laga wada sheekeystaa mawduucyada ku saabsan xeeladaha loo maareeyo dareenka iyo nolosha.	L1

ISLAAM

Ahdaafta fasalka 4. aad	S	u gaar ah degmada	L
T1 in ardeyga lagu hago sidii uu fikir uga qaadan lahaa diinta xiisadda lagu dhiganayo kutubteeda karaameysan, siiradeeda iyo aqoonta ududbdhexaadka u ah diintaas	S1	Waxa la bartaa suuradaha gaagaaban ee Qur'aanka iyo micnohooda (tusaale ahaan suuraddda maroodiga/fiil, suuradda furashada/faatixa, suuradda nasriga, suuradda kowthar, suuradda qureish). Waxaa la bartaa sheekooyinkii anbiyada (tusaale ahaan Saalix, Yoonis, Yacquub, Yuusuf iyo Ayuub).	L1
T2 in ardeyga lagu hago barashada habdhaqanka ay leedahay diinta ay xiisaddu khuseyso iyo sidoo kale goobeheeda iyo dhismayaasheeda barakeysan	S1	Waxaa la gudagalaa qiimaha ay salaadda u leedahay muslimka. Waxaa la bartaa macnaha is daahirinta iyo weysada. Waxaa si qotodheer loo dhexgalaa waajibaadka diiniga ah ee saaran muslimka xilliyada kala duwan ee jadwalka sannadka. Waxaa la gudagalaa xafladaha waaweyn ee jadwalka islaamiga ku xusan iyo maalmaha taariikhiga ah.	L1L2
T3 in ardeyga laga caawiyo sidii uu ku aqoon lahaa ereybixinta diinta iyo astaameheeda u goonida ah	S1 S2	Waxaa laga wada sheekeystaa arrimaha u goonida ah ee lagu garto luuqadda quraanka iyo is barbardhiggooda. Waxaa la bartaa arrimaha ududbdhexaadka u ah islaamka (tusaale ahaan weysada iyo arkaanta islaamka).	L2 L3 L4
T4 in ardeyga lagu hago habkii uu u raadin lahaa, u qiimeyn lahaa una isticmaali lahaa xogta khuseysa diinta ee laga soo uruuriyey ilaha kala duwan	S1S2 S3	Waxaa lagu tababartaa isticmaalka quraanka. Waxaa la baaraa taariikhdii uu quraanku soo dagay. Waxaa la bartaa qeybaha quraanka ee ka hadlaya arkaanta islaamka.	L4 L5 L6
T5 in ardeyga tilmaamo laga siiyo sidii uu fikir uga qaadan lahaa asalka diimaha iyo caqiidooyinka horey uga jirey Finland iyo Yurub iyo xaaladda	S1 S2	Waxaa la bartaa taariikhda ardeyga diintiisa, iyadoo la adeegsanayo siiradii nebiga . Waxaa la bartaa arrimaha ay wadaagaan diimaha yuhuudda, kiristaanka iyo islaamka iyadoo la adeegsanayo siiradii anbiyada.	L1 L2

hadda jirta		Waxaa la bartaa diimaha saameynta ku leh nawaaxiga is-kuulka.	
T7 in ardeyga lagu dhiirrigeliyo ixtiraamka karaamadiisa iyo tan dadka kale una dhaq-mo si tixgelin leh, mar-ka uu ka qeybqaa-danayo kulamada iyo isu immaatinnada diimaha	S1 S2S 3	Waxaa la isla gorfeeyaa arrimaha karaameysan ee khuseeya diinta ardeyga iyo karaamada diimaha kale Waxaa la isla gorfeeyaa waxyaalaha uu islaamku karaamee-yey. Waxaa la isla gorfeeyaa qiimaha ay leedahay aqbalidda iyo u qalbifurnaanshaha dadka kale	L2L5L6
T8 in ardeyga lagu hago ka salgaarista akhlaaqda khuseysa diinta xiisadda lagu dhiganayo iyo akhlaa-qiyaadka kale ee ay diimuhu ka siman yi-hiin	S1 S2 S3	Waxaa la bartaa aasaasiyaadka akhlaaqda islaamka ee ku saabsan xaaraanta iyo xalaasha. Waxaa la bartaa qaacidada dahabiga ah. Waxaa si qotodheer loo dhex galaa hab dhaqameedka islaamiga ah.	L7
T9 in ardeyga lagu hago fahanka xuquuq-da binu aadamka iyo khaas ahaan qiyamka shakhsiga iyo bulshada ee ku qeexan heshiiska xuquuqda carruurta ee qaramada midoobey	S2 S3	Waxaa la bartaa halkudhigga xuquuqda carruurta ee ay da-jisey hay`adda qaramada midoobey. Waxaa la isla gorfeeyaa xiriirka ka dhexeeya xuquuqda iyo waajibaadka, taasoo hordhac u ah shaqada bulshada.	L2
T10 in ardeyga lagu hago sidii uu u qiimeyn lahaa falalka uu xushey inuu sameeyo iyo inuu u miisaamo saameyntooda qaab sugan oo ay akhlaaq ku dhisan tahay	S2S 3	Waxaa la isla falanqeeyaa mawduucyada ku saabsan bad-qabka ardeyga, bulshadiisa iyo jiilka mustaqbalka. (tusaale ahaan dhowrista bey`ada, horumarka waara, ixtiraamka dad-ka kale, samafalka, caddaaladfalka iyo daneynta danta guud).	L1L3 L6
T11 in ardeyga la siiyo fursad uu kaga xaajoon karo su`aalaha khu-seeyo akhlaaqda iyo sidii uu fikirkiisa iyo dareenkiisa ugu cabbi-ro hab ku saleysan wax dhisid iyo sidoo kale inuu sababeyn karo-aragtidiisa	S1 S2 S3	Waxaa laga wadasheekeystaa tusaale ahaan dareenka iyo qiyamka, khaladka iyo saxda iyo nolosha wanaagsan, iyadoo lagu saleynayo Qur'aanka iyo axaadiista.	L1L4L6L7
T12 in ardeyga laga caawiyo sidii uu ku	S3	Waxaa laga wadasheekeystaa ixtiraamka nafta iyo qiimaha shakhsiyadda qofka.	L1

kasban lahaa kuna xoojin lahaa isku kal-sooni buuxda, sawir hagaagsan inuu caa-lamka ka heysto iyo guud ahaan kalsoonida uu ku qabo nolosha		Waxaa laga wadasheekeystaa mawduucyada ku saabsan xeeladaha loo maareeyo dareenka iyo nolosha	

Fasalka 5. aad

ISLAAM

TURKU

Ahdaafta fasalka 5. aad	**S**	**u gaar ah degmada**	**L**
T1 in ardeyga lagu hago sidii uu fikir uga qaadan lahaa diinta xiisadda lagu dhiganayo kutubteeda karaameysan, siiradeeda iyo aqoonta udubdhe-xaadka u ah diintaas	S1	Waxaa la bartaa shakhsiyadda uu lahaa nebi Muxammed. Waxaa labartaa siirooyinkii anbiyaha (tusaale ahaan Idiris, Shu`ayb, Muuse, Zakariye iyo Ciise).	L1
T2 in ardeyga lagu hago barashada habdhaqanka ay leedahay diinta ay xiisaddu khuseyso iyo sidoo kale goobeheeda iyo dhismayaasheeda barakeysan	S1	Waxaa la dhageystaa muusiko anaashiid ah, waxaana laga wada hadlaa micnaha ay muslimiinta ugu fadhiyaan.	L1 L2
T4 in ardeyga lagu hago habkii uu u raa-din la-haa, u qiimeyn lahaa una isticmaali lahaa xogta khuseysa diinta ee laga soo uruuriyey ilaha kala duwan	S1 S2 S3	Waxaa la baaraa habka ay diimuhu ugu muuqdaan warbaahinta. Waxaa la gudagalaa habka ay diintu uga dhexmuuqato suugaanta iyo dhaqanka guud ee bulshada. Waxaa la gudagalaa saameynta uu islaamku ku leeyahay dhaqanka, nakhshadeynta, suugaanta iyo hal abuurka.	L4 L5 L6
T5 in ardeyga tilmaamo laga siiyo sidii uu fikir uga qaadan lahaa asalka diimaha iyo caqiidooyin-ka horey uga jirey Fin-land iyo Yurub iyo xaa-ladda hadda jirta	S1 S2	Waxaa la bartaa sida ay diintu ku bilaabatay/dhalatay, iyadoo hoos loogu dhaadhacayo habdhaqankii muslimiintii hore. Waxaa la isla gorfeeyaa arrimaha sababay in islaamku fido oo uu noqdo diin caalami ah. Waxaa la bartaa asalka diinta finishka; sida ay diinta kiristaanku ku timid Finland.	L1 L2

T6 in ardeyga lagu hago barashada diimaha yuhuudda, kiristaanka iyo islaamka iyo saameynta iyo taariikhda ay diimahaasi Yurub ku leeyihiin	S2 S3	Waxaa la gudagalaa labada qeybood ee uu islaamku u kala baxo ee sunnida iyo shiicada. Waxaa si hordhac ah loo bartaa mabda`a udubdhexaadka u ah diimaha yuhuudda iyo kiristaanka, habdhqanka, kutubtooda karaameysan iyo sida ay diimahaasi ku bilowdeen.  Waxaa la isla gorfeeyaa xiriirka ka dhexeeya diimaha aynu kor kusoo sheegnay iyo islaamka (tusaale ahaan anbiyada/nebiyada).  Waxaa la bartaa aragtida mabda`a binu aadannimada ku saleysan, iyadoo looga tusaale qaadanayo falsafadda nolosha ee diin la`aanta ku dhisan. Waxaa la bartaa arrimaha la xiriira wadaxaajoodka diimaha ka dhexeeya iyo ekumeniyada (xiriirka wadashaqeyn ee ka dhexeeya diimaha iyo kaniisada kiristaanka dhexdooda, si loo helo isu soo dhowaansho)	L2
T7 in ardeyga lagu dhiirrigeliyo ixtiraamka karaamadiisa iyo tan dadka kale una dhaqmo si tixgelin leh, marka uu ka qeybqaadanayo kulamada iyo isu immaatinnada diimaha	S1 S2 S3	Waxaa la bartaa micnaha ay diimuhu uga jeedaan karaamo/barako Tutustutaan. Waxaa la isla gorfeeyaa qiimaha ay leedahay aqbalidda iyo u qalbifurnaanshaha dadka kale.	L2 L5 L6
T8 in ardeyga lagu hago ka salgaarista akhlaaqda khuseysa diinta xiisadda lagu dhiganayo iyo akhlaaqiyaadka kale ee ay diimuhu ka siman yihiin	S1 S2 S3	Waxaa la isla gorfeeyaa akhlaaqda ka wada dhaxeysa diimaha kiristaanka, yuhuudda, islaamka iyo mabada`a binu aadannimada ku dhisan.	L7
T9 in ardeyga lagu hago fahanka xuquuqda binu aadamka iyo khaas ahaan qiyamka shakhsiga iyo bulshada ee ku qeexan heshiiska xuquuqda carruurta ee qaramada midoobey	S2 S3	Waxaa la isla gorfeeyaa ujeeddada iyo baahida loo qabo xuquuqda binu aadamka. Waxaa la isla gorfeeyaa xeerarka wadanoolaanshaha.	L2
T10 in ardeyga lagu hago sidii uu u qiimeyn lahaa falalka uu xushey inuu sameeyo iyo inuu u miisaamo saameyntooda qaab sugan oo ay akhlaaq ku dhisan tahay	S2 S3	Waxaa la isla falanqeeyaa mawduucyada ku saabsan badqabka ardeyga, bulshadiisa iyo jiilka mustaqbalka. (tusaale ahaan dhowrista bey`ada, horumarka waara, ixtiraamka dadka kale, samafalka, caddaaladfalka iyo daneynta danta guud).	L1 L3 L6
T11 in ardeyga la siiyo fursad uu kaga xaajoon karo su`aalaha khuseeyo	S1 S2 S3	Waxaa laga wada sheekeystaa tusaale ahaan dareenka iyo qiyamka, khaladka iyo saxda iyo nolosha wanaagsan.	L1 L4

akhlaaqda iyo sidii uu fikirkiisa iyo dareenkiisa ugu cabbiro hab ku sale-ysan wax dhisid iyo si-doo kale inuu sababeyn karo aragtidiisa			L6 L7
T12 in ardeyga laga caa-wiyo sidii uu ku kasban lahaa kuna xoojin lahaa isku kalsooni buuxda, sawir hagaagsan inuu caalamka ka heysto iyo guud ahaan kalsioonida uu ku qabo nolosha	S3	Waxaa laga wada sheekeystaa ixtiraamka nafta iyo qiimaha shakh-siyadda qofka. Waxaa laga wada sheekeystaa mawduucyada ku saabsan xeeladaha loo maareeyo dareenka iyo nolosha.	L1

Fasalka 6. aad

ISLAAM

TURKU

Ahdaafta fasalka 6.aad	**S**	**U gaar ah degmada**	**L**
T1 in ardeyga lagu hago sidii uu fikir uga qaadan lahaa diinta xiisadda lagu dhiganayo kutubteeda karaameysan, siiradeeda iyo aqoonta ududbdhe-xaadka u ah diintaas	S1	Waxaa kitaab ahaan loo xaqiiqsadaa Qur'aanka; taariikhda soo da-gistiisa, habka uu u dhisan yahay iyo ka fekerqaadashadiisa. Waxaa la bartaa qaar kamid ah suurada gaagaaban ee quraanka iyo micnaha ay leeyihiin (tusaale ahaan aayatul kursi, suurada Al huma-za, suuradda Al-maacuun, suuradda Al-kaafiruun, suuradda Al-masad, suuradda Al-casar, suuradda Al-takaathur iyo suuradda Al-kahfi). Waxaa la bartaa axaadiista nebiga iyo qoraalladooda. Waxaa hoos loogu sii dhaadhacaa aqoonta arkaanta islaamka.	L1
T2 in ardeyga lagu hago barashada habdhaqanka ay leedahay diinta ay xiisaddu khuseyso iyo sidoo kale goobeheeda iyo dhismayaasheeda barakeysan	S1	Waxaa hoos loogu sii dhaadhacaa aqoonta ku saabsan waajibaadka ududbdhexaadka u ah muslimiinta iyo arkaantooda. Waxaa la bartaa magaalooyinka barakeysan ee islaamka, Makka, Mediina iyo Qudus. Waxaa la bartaa xiriirka ka dhexeeya diimaha yuhuudda, kiristaanka iyo islaamka, iyadoo laga iftiin qaadanayo magaalada Qudus. Waxaa la bartaa micnaha ballaaran ee uu masaajidku leeyahay iyo	L1 L2

		astaanta uu xambaarsan yahay.	
T3 in ardeyga laga caawiyo sidii uu ku aqoon lahaa ereybixinta diinta iyo astaameheeda u goonida ah	S1 S2	Waxaa laga wada sheekeystaa farqiga u dhexeeya fasirka Qur'aanka ee ku saleysan micnaha iyo xarafka.	L2 L3 L4
T4 in ardeyga lagu hago habkii uu u raadin lahaa, u qiimeyn lahaa una isticmaali lahaa xogta khuseysa diinta ee laga soo uruuriyey ilaha kala duwan	S1 S2 S3	Waxaa tusaale ahaa loo soo qaataa sida ay diimuhu uga dhex muuqdaan warbaahinta, suugaanta iyo guud ahaan dhaqanka bulshada. Waxaa la isla gorfeeyaa farqiga u dhexeeya aqoonta diinta iyo suugaanta.	L4 L5 L6
T5 in ardeyga tilmaamo laga siiyo sidii uu fikir uga qaadan lahaa asalka diimaha iyo caqiidooyinka horey uga jirey Finland iyo Yurub iyo xaaladda hadda jirta	S1 S2	Waxaa la bartaa khariidadda diimaha iyo falsafadaha nolosha ee ka jira Yurub wakhtiga xaadirka ah.	L1 L2
T6 in ardeyga lagu hago barashada diimaha yuhuudda, kiristaanka iyo islaamka iyo saameynta iyo taariikhda ay diimahaasi Yurub ku leeyihiin	S2 S3	Waxaa hab tusaaleysan loo gudagalaa, saameynta ay diintu ku leedahay gudaha Finland iyo Yurub iyo sida ay uga dhex muuqato.	L2
T7 in ardeyga lagu dhiirrigeliyo ixtiraamka karaamadiisa iyo tan dadka kale una dhaqmo si tixgelin leh, marka uu ka qeybqaadanayo kulamada iyo isu immaatinnada diimaha	S1 S2 S3	Waxaa la isla gorfeeyaa qiimaha ay karaamada/barakada ku leedahay diinta iyo xaaladaha nololeed ee diiniga ah. Waxaa la isla gorfeeyaa, sida loo ixtiraamo waxyaalaha ka karaameysan dadka kale agtooda. Waxaa la isla gorfeeyaa qiimaha ay leedahay aqbalidda iyo u qalbifurnaanshaha dadka kale.	L2 L5 L6
T8 in ardeyga lagu hago ka salgaarista akhlaaqda khuseysa diinta xiisadda lagu dhiganayo iyo akhlaaqiyaadka kale ee ay diimuhu ka siman yihiin	S1 S2 S3	Waxaa la isla gorfeeyaa tusaale ahaan waxa uu islaamka, diimaha kale iyo falsafadda nolosha ay ka qabaan xeerka akhlaaqda dahabiga ah.	L7
T9 in ardeyga lagu hago fahanka xuquuqda binu aadamka iyo khaas ahaan qiyamka shakhsiga iyo bulshada ee ku	S2 S3	Waxaa la bartaa halkudhigga xuquuqda binu aadamka ee ay dajisay hay`adda qaramada midoobey.  Waxaa la isla gorfeeyaa su`aasha ah, miyey jiraan qiyam guud oo mideeya dadka oo dhan.	L2

qeexan heshiiska xu-quuqda carruurta ee qaramada midoobey			
T10 in ardeyga lagu hago sidii uu u qiimeyn lahaa falalka uu xushey inuu sameeyo iyo inuu u miisaamo saameyntooda qaab sugan oo ay akh-laaq ku dhisan tahay	S2 S3	Waxaa la isla falanqeeyaa mawduucyada ku saabsan badqabka ar-deyga, bulshadiisa iyo jiilka mustaqbalka. (tusaale ahaan dhowrista bey`ada, horumarka waara, ixtiraamka dadka kale, samafalka, cad-daaladfalka iyo daneynta danta guud).	L1 L3 L6
T11 in ardeyga la siiyo fursad uu kaga xaajoon karo su`aalaha khuseeyo akhlaaqda iyo sidii uu fikirkiisa iyo dareenkiisa ugu cabbiro hab ku sale-ysan wax dhisid iyo si-doo kale inuu sababeyn karo aragtidiisa	S1 S2 S3	Waxaa laga wada sheekeystaa tusaale ahaan dareenka iyo qiyamka, khaladka iyo saxda iyo nolosha wanaagsan.	L1 L4 L6 L7
T12 in ardeyga laga caa-wiyo sidii uu ku kasban lahaa kuna xoojin lahaa isku kalsooni buuxda, sawir hagaagsan inuu caalamka ka heysto iyo guud ahaan kalsoonida uu ku qabo nolosha	S3	Waxaa laga wada sheekeystaa ixtiraamka nafta iyo qiimaha shakh-siyadda qofka. Waxaa laga wada sheekeystaa mawduucyada ku saabsan xeeladaha loo maareeyo dareenka iyo nolosha	L1

Manhajka waxbarashada tacliinta aasaasiga ah ee Turku cutubka 15: aad fasallada 7-9

15.4.10 DIINTA

Hadafka laga leeyahay maaddada

Hadafka laga leeyahay maaddada diinta, waa iney siiso ardeyga ilbaxnimo diimeed ballaaran oo ku saleysan falsafad sugan. Waxbarashadan waxey ardeyda ku carbineysaa maaddada diinta ee markaas la baranayo iyo qeybaha ay u kala baxdo. Waxey maaddadan ardeyga bareysaa diinta iyo caadooyinka falsafadeed ee ka jira Finland iyo sidoo kale diimaha iyo falsafadaha kale ee ka jira guud ahaan caalamka intiisa kale. Maaddadu waxey horumarineysaa fahanka xiriirka ka dhexeeya diinta iyo dhaqanka, waxeyna bareysaa ardeyga xeelad xog uruurin, taasoo ku saabsan diimaha iyo falsafadaha kala duwan. Waxbarashadu waxey ardeyga aqoon kala duwan ka siineysaa diimaha, taasoo ka caawin doonta inuu fahmo guud ahaan wadaxaaajoodka/wada hadalka laga galo diimaha. Waxaa ardeyga lagu hagayaa inuu u fekero qaab uu maskaxdiisa adeegsanayo waxna isku weydiinkaro iyo inuu ka eego/fiirsho diimaha dhinacyo kala duwan. Inta lagu gudajiro waxbarashadan, waxaa lagu falanqeynayaa xiriirka ka dhexeeya cilmiga iyo diinta iyo sidoo kale luuqadda u goonida ah diimaha, sida mark a laga hadlayo astaamaha lagu kala garto diimaha iyo ereybixinnada diimaha. Waxbarashada xiisadda diinta waxey carbis u tahay wada xaajodka/wada hadalka ka dhexeeya diimaha iyo falsafadaha kala duwan ee nolosha ama wadaxaajoodka ka dhacaya diinta iyo falsafadda gudeheeda. Waxbarashadan waxey ardeyga ku dhiirrigelineysaa inuu ixtiraamo nolosha, qiimaha binu aadamku leeyahay iyo waxyaalaha agtiisa ama dadka kale agtooda ka karaameysan/barakeysan.

Waxbarashada xiisadda diinta waxaa lagu darsayaa, hab akhlaaqeedka looga fekero diinta ay xiisaddu khuseyso iyo diimaha iyo falsafadaha kale ee jira. Sidoo kale waxaa ardeyda lagu bogaadinayaa iney dhankooda ka fekeraan su`aalaha akhlaaqda ku saabsan. Waxbarashadan waxey saacideysaa aqoonta uu ardeygu u leeyahay naftiisa, ixtiraamka uu naftiisa u hayo iyo koboca iskufillaanshaha nololeed muddada uu dhiganayo tacliinta aasaasiga ah. Waxbarashadan waxey ardeyga sahay u siineysaa dhisidda iyo qiimeynta shakhsiyaddiisa, falsafaddiisa nolosha iyo aragtida uu ka aaminsan yahay caalamka intiisa kale. Waxbarashada xiisadda diintu, waxey ardeyga ka kaalmeyneysaa koboca dhinaca bulshada iyo sidii uu ku noqon lahaa xubin xilkas ah oo ka mid ah bulshada dimuqraadiga ah iyo sidii uu ardeygu ku noqon lahaa shakhsi hab caalami ah u fekera.

Fasallada 7-9 Waxbarashada xiisadda diinta waxaa laga salgaaraa diinta ay xiisaddu ku saabsan tahay, iyadoo diiradda lagu saarayo saameynta dhaqan iyo midda bulsho ee ay diintaas leedahay. Xiisadda waxaa lagu sii gudagalaa oo la xoojiyaa aqoonta diinta la baranayo iyo asalkeeda, ilaha ay kasoo farcantay, farriinta ay xambaarsan tahay iyo saameynta ay caalamka ku leedahay.

Xiisadda waxaa lagu dhigtaa dhaxalka diimaha waaweyn ee caalamka ka jira iyo diin la`aanta. Waxbarashada xiisadda waxaa diiradda lagu saraa xoriyadda diinta iyo saameynta ay diintu ku leedahay bulshada iyo siyaasadda. Waxaa la bartaa sida mowduucyada diiniga ah looga dhexsooco kuwa cilmiga ah, warbaahinta, suugaanta iyo habdhaqanka bulshoweynta.

Waxaa xiisadda lagu falanqeeyaa arrimaha udubdhexaadka u ah habfikirka akhlaaqda ku dhisan iyo mabaadii`da akhlaaqda ee khuseeya diinta markaas xiisadda lagu baranayo. Waxaa xiisadda lagu bartaa halkudhigga guud ee caalamka ee ka hadlaya xuquuqda binu aadamka iyo aragtiyada akhlaaqda ee ka dhexeeya diimaha iyo falsafadaha nolosha. Waxaa xiisadda lagu gorfeeyaa su`aalaha la xiriira nolosha iyo aadamaha iyo dhibaatooyinka akhlaaqeed ee xilligaas jira. Tacliinta diinta waxey ardeyga siineysaa awood uu u kaalmeysto kobiciisa.

Ahdaafta laga leeyahay waxbarashada diinta ee fasallada 7-9

Ahdaafta waxbarasho	Cutubyada la xiriira ahdaafta	Aqoon u yeelasho ballaaran
T1 in ardeyga lagu hago ku baraarugga xiriirka ka dhexeeya diinta iyo dhaqanka iyo inuu ardeygu garto kala duwanaanshaha la xiriira diinta	S1, S2	L1
T2 in ardeyga lagu hago sii xoojinta aqoonta uu u leeyahay diinta xiisadda lagu baranayo iyo saameynteeda	S1	L2
T3 in ardeyga lagu hago ka salgaarista diimaha iyo falsafadaha nolosha ee caalamka ka jira iyo sidoo kale diin la`aanta	S2	L2, L3, L6
T4 in ardeyga lagu hago garashada caadooyinka iyo astaamaha u goonida ah diin walba iyo falsafad walba iyo inuu ardeygu ka dhex garto mawduucyada diiniga ah warbaahinta, siyaasadda caalamka, suugaanta iyo dhaqanka dadweynaha	S1, S2, S3	L2, L4, L6
T5 in ardeyga lagu hago ku baraarugga iyo qiimeynta fikradaha kala duwan iyo farqiga u dhexeeya ereybixinta diinta iyo suugaanta	S1, S3	L1, L2, L4, L5, L7
T6 in ardeyga lagu hago ka salgaarista arrimaha udubdhexaadka u ah xuquuqda binu aadamka, fikirka akhlaaqda ku dhisan iyo mabada`a akhlaaqda ee khuseeya diinta xiisadda lagu dhiganayo iyo diimaha iyo falsafada kale ee jira	S3	L2, L7
T7 in ardeyga lagu caawiyo gorfeynta/ka fekerka qiimaha ay diimaha iyo falsafadaha nolosha ku leeyihiin adduunka iyo sida ay dadka u jiheeyaan isla markaana aasaas ugu yihiin camalka ay dadka sameeyaan	S1, S3	L5, L6
T8 in ardeyga lagu dhiirrigeliyo ka fikirka su`aalaha la xiriira nolosha aadamaha, su`aalaha akhlaaqda khuseeya ee saaxada ka jira iyo xiriirka ay la leeyihin qiyamka ardeyga	S1, S2, S3	L7
T9 in ardeyga lagu xiisegaliyo hubsashada camalkiisa iyo saameynta iyo xiriirka uu la leeyahay akhlaaqda, bedqabidda caafimaad iyo ku dhiirrigelinta habdhaqameed waara	S2, S3	L1, L2
T10 in ardeyda lagu geesinnimogeliyo qaabilista iyo la kulanka dadyow kala duwan, hadda iyo mustaqbalka dambe, sida xilliga waxbarashada tanxigta, goobaha shaqada iyo wakhtiyada firaaqada	S1, S2, S3	L6

Mawduucyada iyo casharrada udubdhexaadka u ah ahdaafta xiisadda diinta ee fasallada 7-9

Mawduucyada lagu baranayo xiisada diinta xulashadooda iyo dejintooda waxaa lagu saleeyaa hadafka guud ee laga leeyahay maaddada iyo qaabka loo gaari karo hadafkaas. Marka la dooranayo mawduucyada iyo casharradooda xiisadda lagu dhigayo, waxaa laga faa'iideystaa fursada ka jirta deegaankaas. Fasallada waxaa loo dajiyaa cutubyo iyo casharro kaamil ah oo ku saleysan heerka fasalka uu ardeyga marayo. Marka la dajinayo cutubyada casharrada fasal walba, waxaa la tixgeliyaa heerka aqoonta ardeyga iyo khibradda uu ka heysto caalamka.

S1 Xiriirka uu ardeygu la leeyahay diintiisa: Casharrada waxaa loo xushaa mawduucyada la xiriira dhalashada/soo dagitaanka diinta xiisadda lagu dhiganayo iyo qeybaha ay usii kala baxdo iyo sidoo kale xiriirka ay la leedhay diimaha kale ee jira. Qeybaha ay casharradu khuseeyaa waa aasaaska diinta xiisadda lagu dhiganayo, ilaha ay kasoo

jeeddo, farriinta ay xambaarsan tahay, astaamaha lagu garto, saameynteeda iyo sida ay ugu fidday caalamka iyo Finland. Mawduucyada udubdhexaadka ah ee lasoo qaadanayo waa kuwa saameynta kuleh dhaqanka.

S2 Diimaha caalamka: Casharrada lagu dhiganayo xiisadda waxaa ka mid ah diimaha, diin la`aanta ka jirta Finland iyo caalamka intiisa kale , in diinta loo garto iney tahay qeyb kamid ah ilbaxnimada dhaqanka iyo in diinta loo hubsado qaab cilmiyeysan. Casharrada aasaasiga ah waxaa kamid ah awoodda ay diintu siineyso shakhsiga iyo bulshada iyo xiriirka caalamiga ah ee ka dhexeeya diinta iyo dhaqanka, saameynta ay diimuhu ku leeyihiin bulshooyinka iyo dhaqankooda, isweydiinta fikirka diinta iyo muuqaalka ay diintu ku leedahay dhaqanka dadweynaha. Casharrada loo xushay maaddada waxaa looga danleeyahay iney ardeyga ka caawiyaan falanqeynta diintu ku leedahay warbaahinta, qiimeynteeda iyo isweydiinteeda iyo wadaxaajoodka ka dhexeeya diimaha.

S3 Nolosha wanaagsan: Casharrada loo xulay mawduucan waxaa looga danleeyahay in ardeyga u furfuraan su`aalaha ku saabsan nolosha iyo ka fekerista shakhsiyadda iyo heerka da`da ardeyga. Xiisadda waxaa lagu falanqeeyaa su`aalaha akhlaaqda ee wakhtigaas taagan sida ilbaxnimada bulsho ee ilaalinta bey`ada, ka qeybqaadashada iyo saameynta bulshada iyo sida ay diintu u dhisi karto bulshada iyo xasilloonida caalamka. Casharrada waa iney ka dhex muuqdaan akhlaaqda diinta xiisadda lagu baranayo iyo kuwa diimaha iyo falsafadaha nolosha iyo sidoo kale halkudhigga xuquuqda binu aadamka ee hay`adda qaramada midoobey. Arrimaha xiisadda lagu hubsanayo waxaa ka mid ah meelkadhaca xuquuqda binu aadamka sida xadgudubyadii dhacay dagaalkii labaad ee adduunka. Marka la xulayo casharrada, waxaa la tixgeliyaa qiimaha ay diinta iyo falsafadda noloshu ku leedahay weynaanta iyo koboca shakhsiga.

Ahdaafta la xiriirta deegaanka lagu baranayo iyo habka loo baranayo maaddada diinta ee khuseysa fasallada 7-9

Hadafku waa in si ixtiraam iyo sharaf ku jirto loo muujiyo diimaha iyo falsafadaha nolosha ee ay matalayaan ardeyda dhigata iskuulka. Qaabka wax loo baranayo wuxuu ku saleysan yahay hab ka sheekeyn, jilitaan, tijaabin, camali iyo hab wadajir ku dhisan. Waxaa aasaas ah in si qotodheer loo falanqeeyo arrimaha xiisadda lagu dhiganayo iyo in si wadajir ah looga wada fekero arrimahaas. Xiisadda diinta, waxaa loo adeegsadaa barnaamijyo kumbiyuutar la adeegsanayo oo horumarinayo fahanka casharrada, kuwaaso muujinaya firfircoonida iyo wada macaamalka ardeyda dhexdooda. Waxaa xoogga la saaraa in si aan degdeg laheyn wax loo falanqeeyo. Wadasheekeysigu waa qeyb muhiim ah oo kamid ah waxbarashada xiisadda. Waxaa waxbarashada loo adeegsan karaa booqashooyin lagu tago meelo kale iyo in dad lagu martigeliyo xiisadda, taasoo lagu saleynayo fursadda jirta. Waxaa xiisadda dhexdeeda lagaga shaqeyn karaa mashaariic ay ardeydu wada fulinayaan iyo kuwa kelikeli ah, kuwaasoo ka dhexeyn kara cutubyada casharra u degsan maaddada ama maaddooyin kale oo aan ku tacalluqin diinta.

Hagitaan, tixgelinta baahida iyo kaladuwanaanshaha ardeyda iyo ka taakuleynta maaddada diinta ee fasallada 7-9

Marka la dhaqangelinyo dhigashada cutubyada casharro ee maaddadan, waxaa tixgelin gaar ah la siiyaa diinta iyo caqiidada ee uu ardeygu kasoo jeedo iyo heerka ay mareyso aqoontiisa luuqadda. Waxaa la abuuraa xaalado lagu horumarinayo ka qeybqaadashada xiisadda iyo wadamacaamalka ardeyda dhexdooda, waxaana la xoojiyaa firfircoonida iyo xeeladaha waxbarasho ee ardeyga.

Qiimeynta heerka aqoonta ardeyga ee maaddada diinta ee fasallada 7-9

Qiimeynta waxey ku saleysan tahay ku baraarugga shaqada ardeyda iyo wadasheekeysiga ardeyda ka dhexeeya iyo hubsashada shaqooyinka kala duwan ee ay ardeydu soo saaraan. Waxsoosaarka ardeyda kasokow, waxaa la qiimeeyaa habsami usocodka waxbarashada iyo heerarka kala duwan ee shaqada. Qiimeyntu waa mid kalanooc ah oo jiheyneysa islamarkaana dhiirrinagelineysa ardeyga. Waxaa ardeyda si joogto ah loo siiyaa xog/macluumaad ka hadleysa horumarka waxbarashadooda iyo sida ay u gaareen hadafkii loo dajiyey. Qiimeynta waxaa xoojisa oo la adeegsadaa natiijada kasoo baxda isqiimeynta ardeygu uu naftiisa isagu qiimeeyo.

Qiimeynta ugu dambeysa waxey ku aadan tahay sannaddugsiyeedka ay dhammeystirmaan casharrada ka wada dhexeeya ardeyda ee maaddada diinta u dagsan. Qiimeynta ugu dambeysa waxaa lagu qeexaa, sida uu ardeygu u gaaray ahdaafta u dagsaneyd maaddada xilliga ay waxbarashadu dhammaato. Natiijada ugu dambeysa waxaa lagu saleeyaa barbardhigga heerka aqoonta ardeyga, marka loo fiiriyo halbeegga u dagsan qiimeynta maaddada ee waddanka oo dhan. Aqoonta maaddada diintu, waxey la kobceysaa kolba sida qotada dheer ee uu fekerka ardeygu u balaarto. Marka la dajinayo natiijada ugu dambeysa ee maaddada diinta, waxaa si buuxda loo tixgeliyaa halbeegga u dagsan qiimeynta ugu dambeysa maaddada ee waddanka oo dhan ka dhexeysa, iyadoo aan loo eegeynin hadafhoosaadka manhajka waxbarashada ee degmada/magaalada u gaarka ah. Wuxuu ardeygu helayaa buundo/natiijo udhiganta siddeed (8), haddii uu muujiyo heer aqoon dhexdhexaad ah ee uu qeexayaan halbeegga qiimeynta. Hadii ay natiijada ardeyga ee khuseeya ahdaafka qaarkood ay ka saramarto buuntada siddeed, waxey kor usoo qaadi kartaa natiijada qeybaha kale ee ahdaafta ee uu ardeygu ku liitay.

Halbeegga lagu saleeyo qiimeynta ugu dambeysa ee maaddada, taasoo muujineysa aqoon u yeelasho heer fiican (natiijo 8), kadib markii ay dhammaadaan casharrada ay maaddadu ka kooban tahay

Hadafka waxbarasho	Cutuby-ada	Qeybaha ay khuseyso qiimeynta maaddada	Heer aqoon oo u dhiganta natiija-da/buundada siddeed
T1 in ardeyga lagu hago ku baraarugga xiriirka ka dhexeeya diinta iyo dhaqanka iyo inuu ardeygu garto kala duwanaanshaha la xiriira diinta	S1, S2	Sawirashada qiimaha ay diintu ku leedahat dhaqanka iyo bulshada	Ardeyga wuu magacaabi karayaa wuuna kadhex garanayaa dhaqanka ku hareereysan calaamada la xiriirta diinta.
T2 in ardeyga lagu hago sii xoojinta aqoonta uu u leeyahay diinta xiisadda lagu baranayo iyo saameynteeda	S1	Xakameynta macluumaadka ku saabsandiinta	Ardeyga sawir ayuu ka bixin karaa sidey ku bilaabatay diinta uu xiisadda ku dhigtay iyo saameynteeda. Wuu garanayaa tacliinta aasaasiga ah ee diinta, wuuna sheegi karayaa ilaha ay kasoo fushay.
T3 in ardeyga lagu hago kasalgaarista diimaha iyo falsafadaha nolosha ee caalamka ka jira iyo diin la`aanta	S2	Garashada diimaha iyo falsafadaha nolosha ee caalamka ka jira	Ardeyga wuu muujin karaa aqoonta aasaasiga ah ee uu uleeyahay diimaha waaweyn ee caalamka saameynta kuleh iyo diin la`aanta. Sawir ayuu ka bixin karaa kaladuwanaanshaha kadhex jira diimaha iyo falsafadaha nolosha.
T4 in ardeyga lagu hago garashada habdhaqanka iyo astaamaha ay leeyihiin diimaha iyo falsafadaha kala duwan iyo inuu mawduucyada diiniga ah kadhex garto warbaahinta, siyaasadda caalamka, suugaanta iyo dhaqanka dadweynaha	S1-S3	Xeeladda akhrinta diinta iyo dhaqanka	Ardeygu wuu magacaabi karayaa habdhaqanka iyo astaamaha diimaha kala duwan. Tusaale ayuu ka bixin karaa mawduucyada diiniga ah ee ku xusan warbaahinta, suugaanta ama dhaqanka dadweynaha.

T5 in ardeyga lagu hago ku baraarugga iyo qiimeynta fikradaha kala duwan iyo farqiga u dhexeeya ereybixinta diinta iyo suugaanta	S1, S3	Xeeladda la macaamalka dadka kale iyo habka loo fekero	Ardeygu wuu garan karaa oo tusaale ayuu ka bixin karaa aragtiyada kala duwan ee jira iyo qaar kamid ah farqiga u dhexeeya ereybixinta diinta iyo suugaanta.
T6 in ardeyga lagu hago ka salgaarista arrimaha ududbdhexaadka u ah xuquuqda binu aadamka, fikirka akhlaaqda ku dhisan iyo mabada`a akhlaaqda ee khuseeya diinta xiisadda lagu dhiganayo iyo diimaha iyo falsafadaha kale ee jira	S3	Macluumaadka khuseeya akhlaaqda iyo xuquuqda aadamaha	Ardeygu wuu garanayaa wuuna magacaabi karayaa arrimaha aasaaska u ah akhlaaqda. Wuu magacaabi karayaa fikirka ay xambaarsan yihiin heshiisyada ugu muhiimsan xuquuqda binu aadamka. Ardeyga wuu garanayaa mabaadii`da diinta ay xiisaddu khuseyso iyo diimaha kale.
T7 in ardeyga lagu caawiyo gorfeynta/ka fekerka qiimaha ay diimaha iyo falsafadaha nolosha ku leeyihiin adduunka iyo sida ay dadka u jiheeyaan isla markaana aasaas ugu yihiin camalka ay dadka sameeyaan	S1, S3	Qiimaha ay caalamka u leeyihiin diimaha iyo falsafadaha nololeed	Ardeyga wuu qiimeyn karaa oo sawir ayuu ka bixin karaa qiimaha ay diimuhu leeyihiin iyo sida ay dadka u jiheeyaan isla markaana aasaas ugu yihiin camalka ay dadka sameeyaan.
T8 in ardeyga lagu dhiirrigeliyo ka fikirka su`aalaha la xiriira nolosha aadamaha , su`aalaha akhlaaqda khuseeya ee saaxada ka jira iyo xiriirka ay la leeyihiin qiyamka ardeyga	S1, S2, S3	Habfikir akhlaaq ku dhisan	Ardeygu wuu ka baaraandegi karaa su`aalaha la xiriira nolosha binu aadamka, waxna wuu ka sheegi karaa su`aalaha akhlaaqda ku saabsan ee saaxada ka jira.
T9 in ardeyga lagu xiisegaliyo hubsashada camalkiisa iyo saameynta iyo xiriirka uu la leeyahay akhlaaqda, badqabidda caafimaad iyo ku dhiirrigelinta habdhaqameed waara	S2, S3	Habfikir akhlaaq ku dhisan	Ardeygu wuu ka baaraandegi karaa saameynta ay falkiisu ku leeyahay akhlaaqda, badqabidda caafimaad iyo habdhaqanka waara.
T10 in ardeyda lagu geesinnimogeliyo qaabilista iyo la kulanka dadyow kala duwan, hadda iyo mustaqbalka dambe, sida	S1-S3		Saameyn kuma lahan natiijada uu ardeygu helayo. Waxaa ardeyda lagu hagaa iney khibraddooda ka fekeraan si ay naftooda u qiimeyn karaan.

xilliga waxbarashada tan-xigta, goobaha shaqada iyo wakhtiyada firaaqada			

Cadadadka casharrada kala duwan ee ay maaddada diinta ka kooban tahay ee khuseeya fasallada 7-9

Sida uu dhigayo sharciga tacliinta aasaasiga ah qodobkiisa 11§:aad, maaddooyinka tacliinta aasaasiga ah waa iney kamid noqoto maaddada diinta ama cilmiga falsafadda nolosha. Isla sharcigaas qodobkiisa 13§:aad wuxuu qabaa in maaddada diinta ee ardeyda loo dhigayo ay waafaqsanaato diimaha uu aaminsan yihiin, maaddadaas oo ka kooban cutubyo casharro kala duwan ah. Si maaddada ay iskula jaanqaaddo, dhammaan waxbarashada maaddada diinta waxaa loo dajiyey ahdaaf iyo casharro udubdhexaad u ah maaddada.

Marka la dajinayo casharro ee ay maaddau ka koobnaaneyso, ayaa la qeexaa inta cashar ee ka wada dhexeeya diimaha kala duwan, iyadoo la waafajinayo diinta uu ardeygu aaminsan yahay. Waxaa la dajiyaa manhajyo waxbarasho oo degmo walbo u gaar ah, kuwaasoo lagu kordhiyo manhajka guud ee maaddada, iyadoo lasii qeexayo hadafka maaddada laga leeyahay iyo inta cashar ee ay diin walba maaddadeedu ka koobnaaneyso.

ISLAAM

Sawir kabixinta cadadka casharrada ee ay maddadan ka kooban tahay, ayaa waxaa lagu qeexayaa casharrada ay ka siman yihiin diimaha oo dhan. Manhajyada waxbarasho ee u goonida ah degmada, waxaa lagu sii qeexaa/sharxaa tirada casharro ee ay maaddadu ka koobnaaneyso iyo ahdaafta laga leeyahay maaddada diinta ee ku xusan manhajka guud ee waxbarashada.

S1 Xiriirka uu ardeygu la leeyahay diintiisa: Xiisadda waxaa lagu gorfeeyaa islaamka ka jira dhinacyada kala duwan ee caalamka. Xiisadda waxaa si qotodheer loogu xoojiyaa aqoonta taariikhda islaamka laga soo billaabo wakhtigii nebi Maxammed illaa fiditaankii dowladdii islaamka iyo sii waarista diinta islaamka. Casharrada waxaa udubdhexaad u ah, kala duwanaanshaha islaamka, Faracyada ugu waaweyn, dhaqdhaqaaqyada islaamiga ee casriga ah iyo siyaasadda islaamka. Waxaa la isla gorfeeyaa isku qalbi furnaanshaha diinta ah iyo wadanoolaanshaha. Mawduucyada casharrada muhiimka ah waxaa kamid ah islaamka iyo muslimiinta Finland ku nool , taariikhda ururinta Qur'aanka iyo axaadiista, qaab dhismeedkooda iyo fasirkooda, aasaaska cilmiga islaamka iyo saameynta gudashada waajibaadka diiniga ah ay ku leeyihiin nolosha qeybeheeda kala duwan iyo saameynta dhaqan ee uu islaamku ku leeyahay cilmiga iyo suugaanta. Waxaa si kalaqeybsan loo kala dhigaa, xiriirka uu ardeyga la leeyahay islaamka, finishka iyo caalamka islaamiga ah.

S2 Diimaha caalamka: Waxaa la bartaa qaabka ay u fideen diimaha waaweyn ee adduunka, farriimaha ay xanbaarsan yihiin iyo saameynta ay ku leeyihiin dhaqanka caalamka. Waxaa la dhigtaa falsafadda nolosha ee diin la`aanta. Waxaa la gudagalaa cilmibaarista diinta iyo farqiga u dhexeeya ereybixinta diinta iyo cilmiga. Waxaa ardeyga laga caawiyaa inuu diinta ka dhexgarto dhaqanka, warbaahinta, iyo dhaqanka shacabweynaha iyo inuu garto saameynta diinta ay ku leedahay siyaasadda. Waxaa la wada gorfeeyaa tixgelinta kaladuwanaanshaha diinta iyo sida ay diintu uga mid tahay dhaqanka aqoonsiga shakhsiyadda.

S3 Nolosha wanaagsan: Casharrada xiisadda udubdhexaadka u ah waxaa ka mid ah qaab dhismeedka akhlaaqda islaamiga ah, falalka iyo waxa kadhasha iyo fasirka shareecada islaamku laga heysto bulshada iyo jaaliyadaha muslimka ah dhexdooda. Waxaa la isla gorfeeyaa xiriirka ay shareecada islaamka la leedahay fiqiga iyo madaahibta ,

waxaana la dhigtaa asluubta islaamka. Casharrada muhiimka ah waxaa kamid ah halkudhigga xuquuqda binu aadamka ee hay`adda qaramada midoobey, akhlaaqda xuquuqda aadamaha iyo su`aalaha kala duwan ee ku saabsan akhlaaqda ee saaxada ka jira. Waxaa la dhigtaa wadaxaajoodka diiniga ah iyo doorka ay diintu ku leedahay sugida ammaanka bulshada. Waxaa la isla gorfeeyaa masuuliyadda dadka ka saaran deegaanka iyo saameynta ay dadka u leeyhiin.

Fasalka 7. aad

ISLAAM

TURKU

Ahdaafta fasalka 7. aad	**S**	**U gaar ah degmada**	**L**
T1 in ardeyga lagu hago ku baraarugga xiriirka ka dhexeeya diinta iyo dhaqanka iyo inuu ardeygu garto kala duwanaanshaha la xiriira diinta	S1 S2	Waxaa la dhigtaa arrimaha la xiriira diinta iyo dhaqanka. Waxaa la gorfeeyaa diinta oo dhaqanka qeyb ka ah iyo aqoonsidhaqameedka uu shakhsigu leeyahay. Waxaa laga salgaaraa fidista iyo saameynta ay dhaqanka ku leeyihiin diimaha caalamka. Waxaa la dhigtaa kala duwanaanshaha ka dhexjira diimaha iyo dhaqamada.	L1
T2 in ardeyga lagu hago sii xoojinta aqoonta uu u leeyahay diinta xiisadda lagu baranayo iyo saameynteeda	S1	Waxaa la qotodheereeyaa aqoonta ku saabsan islaamka adduunka kajira.	L2
T3 in ardeyga lagu hago kasalgaarista diimaha iyo falsafadaha nolosha ee caalamka ka jira iyo diin la`aanta	S2	Waxaa la dhigtaa farriimaha aasaasiga ah ee ay xambaarsan yihiin diimaha caalamka. Waxaa la qotodheereeyaa aqoonta ku saabsan falsafadaha nolosha ee aan diinta ku saleysneyn (tusaale ahaan mabda`a binu aaddannimada ku dhisan).  Waxaa la dhigtaa erayada ay kamidka yihiin diinlaawe, diin la`aan iyo diin waxkasheegis/dhalliilid iyo micnaha loola jeedo.	L2 L3 L6
T4 in ardeyga lagu hago garashada habdhaqanka iyo astaamaha ay leeyihiin diimaha iyo falsafadaha kala duwan iyo inuu mawduucyada diiniga ah kadhex garto war-	S1-S3	Waxaa la dhigtaa astaamaha lagu garto diimaha kala duwan iyo habdhaqameedkooda (tusaale ahaan. xeerka cuntada iyo labiska). Waxaa laga salgaaraa muuqaalka ay diintu ku leedahay qeybaha kala duwan ee dhaqanka sida suugaanta.	L2 L4 L6

baahinta, siyaasadda caalamka, suugaanta iyo dhaqanka dadweynaha			
T5 in ardeyga lagu hago ku baraarugga iyo qii-meynta fikradaha kala duwan iyo farqiga u dhe-xeeya ereybixinta diinta iyo suugaanta	S1 S3	Waxaa la dhigtaa farqiga u dhexeeya wax dabiici ah iyo awoodda ka weyn dabiiciga. Waxaa la dhigtaa farqiga u dhexeeya aqoonta diinta iyo seyniska iyo sida ay caalamka u kala arkaan Waxaa lagu tababartaa fahanka fikradaha kala duwan iyo saba-beynta fikirka qofka u gaarka ah.	L1 L2 L4 L5 L7
T7 in ardeyga lagu caa-wiyo gorfeynta/ka feker-ka qiimaha ay diimaha iyo falsafadaha nolosha ku leeyihiin adduunka iyo sida ay dadka u ji-heeyaan isla markaana aasaas ugu yihiin camal-ka ay dadka sameeyaan	S1 S3	Waxaa la isla gorfeeyaa qiimaha ay caqiidooyinka kala duwan u leeyihiin bulshada. Waxaa la isla gorfeeyaa qiimaha ay caqiidadu u leedahay nolosha qofka.	L5 L6
T9 in ardeyga lagu xiise-galiyo hubsashada ca-malkiisa iyo saameynta iyo xiriirka uu la leeyahay akhlaaqda, badqabidda caafimaad iyo ku dhiirri-gelinta habdhaqameed waara	S2 S3	Waxaa la isla gorfeeyaa falalka uu qofku la yimaaddo iyo saa-meynta akhlaaqeed ee ay ku leeyihiin bedqabista caafimaad.	L1 L2
T10 in ardeyda lagu gee-sinnimogeliyo qaabilista iyo la kulanka dadyow kala duwan, hadda iyo mustaqbalka dambe, sida xilliga waxbarashada tanxigta, goobaha sha-qada iyo wakhtiyada firaaqada	S1- S3	Waxaa laga wada sheekeystaa sinnaanta caqiidooyinka kala du-wan iyo sababta loogu baahan yahay in qofwalba uu xog aasaasi ah ka heysto diimaha iyo caqiidooyinka kale ee jira, maaddaama ay isdhexgalka dhaqamadu kusii badanayaan deegaanka.	L6

Fasalka 8. aad

ISLAAM

TURKU

Ahdaafta fasalka 8. aad	S	U gaar ah degmada	L
T1 in ardeyga lagu hago ku baraarugga xiriirka ka dhexeeya diinta iyo dhaqanka iyo inuu ardeygu garto kala duwanaanshaha la xiriira diinta	S1 S2	Waxaa laga salgaaraa islaamka ka jira goobaha kala duwan ee caalamka. Waxaa la bartaa saameynta uu islaamku ku leeyahay dhaqanka goobaha kala duwan ee caalamka.	L1
T2 in ardeyga lagu hago sii xoojinta aqoonta uu u leeyahay diinta xiisadda lagu baranayo iyo saameynteeda	S1	Waxaa la dhigtaa taariikhda islaamka laga soo billaabo xilligii uu soo dagay illaa heerkii uu ku kala qeybsamay. Waxaa la baaraa taariikhda ay kasoo bilowdeen Qur'aanka iyo axaadiista, fikirka ay xanbaarsan yihiin iyo habka fasirkooda. Waxaa lasii qotodheereeyaa xogta uu ardeygu ka heysto aasaasiyaadka islaamka; arkaanta iimaanka iyo arkaanta islaamka.	L2
T4 in ardeyga lagu hago garashada habdhaqanka iyo astaamaha ay leeyihiin diimaha iyo falsafadaha kala duwan iyo inuu mawduucyada diiniga ah kadhex garto warbaahinta, siyaasadda caalamka, suugaanta iyo dhaqanka dadweynaha	S1-S3	Waxaa la bartaa faracyada guud ee islaamka iyo fikirka ay xambaarsan yihiin; sunniga iyo shiicada iyo suufiyada. Waxaa la dhigtaa dhaqdhaqaaqyada islaamiga ee casriga ah. Waxaa la gudagalaa qiimaha iyo saameynta uu islaamku ku leeyahay Finland.	L2 L4 L6
T5 in ardeyga lagu hago ku baraarugga iyo qiimeynta fikradaha kala duwan iyo farqiga u dhexeeya ereybixinta diinta iyo suugaanta	S1 S3	Waxaa la bartaa qaababka fasirka Qur'aanka iyo waxyaalaha ka dhasha.	L1 L2 L4 L5 L7
T6 in ardeyga lagu hago ka salgaarista arrimaha udubdhexaadka u ah xuquuqda binu aadamka, fikirka akhlaaqda ku dhisan iyo mabada`a akhlaaqda ee khuseeya diinta xiisadda lagu dhiganayo iyo diimaha iyo falsafada kale ee jira	S3	Waxaa laga salgaaraa farriimaha iyo akhlaaqda ay xambaarsan yihiin faracyada islaamka. Waxaa laga wadasheekeystaa xorriyadda diimaha. Waxaa laga wadasheekeystaa wadashaqeynta ka dhexeysa diimaha iyo qiimaha ay u leedahay xasilloonida caalamka.	L2 L7
T7 in ardeyga lagu caawiyo gorfeynta/ka fekerka qiimaha ay diimaha iyo falsafadaha nolosha ku leeyihiin adduunka iyo sida ay dadka u jiheeyaan isla markaana aasaas ugu yihiin camalka ay dadka sameeyaan	S1 S3	Waxaa la isla gorfeeyaa waajibaadka diiniga ah ee saaran muslimka iyo saameynta ay ku leeyihiin qeybaha kala duwan ee nolosha. Waxaa la isla gorfeeyaa oo laga wadasheekeystaa su`aalaha ku saabsan akhlaaqda islaamiga.	L5 L6

T9 in ardeyga lagu xiise-galiyo hubsashada ca-malkiisa iyo saameynta iyo xiriirka uu la lee-yahay akhlaaqda, bad-qabidda caafimaad iyo ku dhiirrigelinta habdhaqa-meed waara	S2 S3	Waxaa la dhigtaa tilmaamaha islaamka, Qur'aanka iyo axaadiista ee ka hadlaya nolosha wanaagsan. Waxaa laga wadasheekeystaa sida ay tilmaamahaasi uga dhex muuqdaan nololmaalmeedka muslimiinta ku nool Finland.	L1 L2
T10 in ardeyda lagu gee-sinnimogeliyo qaabilista iyo la kulanka dadyow kala duwan, hadda iyo mustaqbalka dambe, sida xilliga waxbarashada tanxigta, goobaha sha-qada iyo wakhtiyada firaaqada	S1-S3	Waxaa si kalaqeybsan loo kala dhigaa, xiriirka uu ardeyga la lee-yahay islaamka, finishka iyo caalamka islaamiga ah.	L6

Fasalka 9. aad

ISLAAM

TURKU

Ahdaafta fasalka 9. aad	**S**	**U gaar ah degmada**	**L**
T1 in ardeyga lagu hago ku baraarugga xiriirka ka dhexeeya diinta iyo dha-qanka iyo inuu ardeygu garto kala du-wanaanshaha la xiriira diinta	S1 S2	Waxaa laga salgaaraa saameynta uu islaamku ku leeyahay dha-qanka (tusaale ahaan marka lagu gudajiro fulinta go`aamada iyo sharcidejinta bulshada).	L1
T2 in ardeyga lagu hago sii xoojinta aqoonta uu u leeyahay diinta xiisadda lagu baranayo iyo saa-meynteeda	S1	Waxaa la bartaa arrimaha aasaasiga u ah akhlaaqda islaamiga ah (tusaale ahaan falalka iyo waxa kadhasha, sharciga islaamka iyo shareecada iyo sida loo kala fasiro). Waxaa laga salgaaraa xiriirka ay shareecada islaamku la leedahay fiqiga iyo madaahibta. Waxaa la baraa siyaasadda islaamka.	L2
T4 in ardeyga lagu hago garashada habdhaqanka iyo astaamaha ay lee-	S1-S3	Waxaa la dhigtaa sidii mawduucyada islaamiga ah looga dhex aqoonsan lahaa warbaahinta, siyaasadda iyo dhaqanka bul-	L2 L4 L6

yihiin diimaha iyo falsafadaha kala duwan iyo inuu mawduucyada diiniga ah kadhex garto warbaahinta, siyaasadda caalamka, suugaanta iyo dhaqanka dadweynaha		showeynta. Waxaa laga salgaaraa akhlaaqda la xiriirta caadooyinka, iyadoo la adeegsanayo tusaalaha warbaahinta ku xusan ee saaxada kajira.	
T5 in ardeyga lagu hago ku baraarugga iyo qiimeynta fikradaha kala duwan iyo farqiga u dhexeeya ereybixinta diinta iyo suugaanta	S1 S3	Waxaa la bartaa caqabadaha akhlaaqda iyo xal u helistoosa Waxaa si cilmiyesan loo falanqeeyaa akhlaaqda Waxaa laga wadasheekeystaa dhibaatooyinka la xiriira akhlaaqda iyo siyaabaha loo kala fasiro. Waxaa lagu tababartaa ku baraarugga fikradaha kala duwan iyo sababeynta fikirka shakhsiga ee goonida ah.	L1 L2 L4 L5 L7
T6 in ardeyga lagu hago ka salgaarista arrimaha udubdhexaadka u ah xuquuqda binu aadamka, fikirka akhlaaqda ku dhisan iyo mabada`a akhlaaqda ee khuseeya diinta xiisadda lagu dhiganayo iyo diimaha iyo falsafada kale ee jira	S3	Waxaa laga salgaaraan fikirka ay falsafadaha kale ee noloshu ka aamisan yihiin akhlaaqda. Waxaa la bartaa garashada iyo fahanka aasaaska akhlaaqda ; mooraalka, qiyamka iyo xeerarka la wada dajistay. Waxaa la bartaa halkudhigga xuquuqda binu aadamka ee hay`adda qaramada midoobey iyo akhlaaqda khuseysa xuquuqda binu aadamka. Waxaa laga wadasheekeystaa xadgudubyada xuquuqda aadamaha, sida xadgudubkii dhacay dagaalkii labad ee adduunka.	L2 L7
T7 in ardeyga lagu caawiyo gorfeynta/ka fekerka qiimaha ay diimaha iyo falsafadaha nolosha ku leeyihiin adduunka iyo sida ay dadka u jiheeyaan isla markaana aasaas ugu yihiin camalka ay dadka sameeyaan	S1 S3	Waxaa laga salgaaraa saameynta ay akhlaaqdu ku eleedahay qeybaha kala duwan ee nolosha (tusaale ahaan bulshada iyo deegaanka). Waxaa lasii qotodheereeyaa fahanka ku saabsan saameynta ay caqiidooyinku ku leeyihiin bulshada iyo siyaasadda caalamka. Waxaa laga wadasheekeystaa qiimaha ay akhlaaqda islaamku ku leedahay jiheynta shakhsiga.	L5 L6
T8 in ardeyga lagu dhiirrigeliyo ka fikirka su`aalaha la xiriira nolosha aadamaha, su`aalaha akhlaaqda khuseeya ee saaxada ka jira iyo xiriirka ay la leeyihiin qiyamka ardeyga	S1-S3	Waxaa la isla gorfeeya qofka shakhsiyaddiisa iyo ku dhaqanka akhlaaqda	L7
T9 in ardeyga lagu xiisegaliyo hubsashada camalkiisa iyo saameynta iyo xiriirka uu la leeyahay	S2 S3	Waxaa la isla gorfeeyaa falalka uu qofku la yimaaddo iyo saameynta akhlaaqeed ee ay ku leeyihiin bedqabista caafimaad.	L1 L2

akhlaaqda, badqabidda caafimaad iyo ku dhiirri-gelinta habdhaqameed waara				
T10 in ardeyda lagu gee-sinnimogeliyo qaabilista iyo la kulanka dadyow kala duwan, hadda iyo mustaqbalka dambe, sida xilliga waxbarashada tanxigta, goobaha sha-qada iyo wakhtiyada firaaqada	S1-S3	Waxaa hoosta laga xarriiqaa qiimaha ay leedahay aqbalista iyo u qalbi furnaanshaha dadka kale iyo isdhexgalka dhaqamada kala duwan.	L6	